SALDHIG INSTITUTE

# ISBEDDELKA AL-SHABAAB:

## MA ISTIRAATIIJI BAA MISE WAA MID LAGU QASBAY?

Qiimeyn ku saabsan isbeddellada istiraatiijiyadeed, hawlgal iyo maamul ee kooxda iyo arrimaha horseedaya isbeddelladaas.




Juun 2026 | Muqdisho, Soomaaliya

MACHADKA SALDHIG
SALDHIG INSTITUTE

# ISBEDDELKA AL-SHABAAB:

## MA ISTIRAATIIJI BAA MISE WAA MID LAGU QASBAY?

Qiimeyn ku saabsan isbeddellada istiraatiijiyadeed, hawlgal iyo maamul ee kooxda iyo arrimaha horseedaya isbeddelladaas.

MAAMUL

TEKNOOLAJIYAD

HOWLGALLADA MILATARI

# Tusmada


**Soo Koobid ....................................................................5**

**1. Hordhac ......................................................................7**

**2. Habraaca Cilmi-baarista ...............................................9**

Xog aruurin/wareysiyo. ........................................................ 9

Gorfeyn .................................................................................. 9

Isbarbardhig Waqtiyeed........................................................ 10

Ilaalinta xogta, Anshaxa iyo badqabka Ila xogta .............................. 10

**3. Maxaa Iska beddelay Istiraatiijiyadda Al-Shabaab Sannadihii u Dambeeyay? ..........................................11**

**4. Sidee Ayay Isu Beddelleen Hawlgallada Militari ee Al-Shabaab? ..................................................................14**

Xog uruurin xooggan ........................................................... 14

Diyaarinta ciidanka weerarka fulinaya ............................................ 15

Waqtiga: Aalad Maldahan...................................................... 15

Kedinta Cadowga ..................................................................... 15

Adeegsiga awood xad-dhaaf ah ............................................. 16

Doorashada Goorta ................................................................ 16

Filashada natiijada ................................................................ 16

**5. Waa Maxay Doorka Tiknoolajiyaddu Ku Leedahay Hawlgallada iyo Istiraatiijiyadda Al-Shabaab? ..................17**

Adeegsiga Tignoolajiyadda: Isgaarsiinta, Diyaaradaha Aan Duuliyaha Lahayn (Drones), iyo Internet-ka............................................ 17

Farsamooyinka Xog-ururinta Sirdoonka .......................................... 18

Ka Faa'iidaysiga Baraha Bulshada iyo Warbaahinta si ay ugudbiso Fariinteeda........................................................................ 18

**6. Sidee Ayay Isku Beddeshay Istiraatiijiyadda Guud ee Al-Shabaab Marka Laga Eego Maamulka, Dagaalka iyo Siyaasadda?.................................................................20**

Sidee Ayey Istaraatiijiyadda Kooxdu Iskaga Beddashay Dhinacyada Siyaasadda iyo Milatariga? .......... 20

Qaabka Hawlgal ee Kooxda .......... 21

Astaamaha Sirdoon ee Muujinaya Suurtagalnimada Nuuc Wadaxaajood oo ay Alshabaab Aqbali Karto .......... 23

Gacan-ku-haynta Deegaannada iyo Weerarrada Joogtada ah: Midkee Mudnaanta U Leh Al-Shabaab? .......... 23

Sidee Ayey Kooxdu Uga Falcelisaa Cadaadis Ciidan oo Xooggan? 24

**7. Sidee Ayuu Isku Beddelay Xiriirka Ka Dhexeeya Al-Shabaab iyo Bulshooyinka Deegaanka? .......... 26**

**8. Sidee Ayuu Isku Beddelay Habka Qorista Xubnaha Cusub? .......... 28**

Isku-dhafka Qasab, Bixinta Adeegyada, iyo Barbaarinta Fikradeed 29

**9. Sidee Loo Saadaalin Karaa Mustaqbalka Istiraatiijiyadda iyo Xeeladaha Al-Shabaab? .......... 30**

Sidee Ayey Xaaladahani U Saamayn Karaan Al-Shabaab? .......... 31

**10. Haddaba, Maxaa Laga Filan Karaa Al-Shabaab Sannadaha Soo Socda? .......... 33**

**11. Sidee Ayuu U Qaabaysan Yahay Xiriirka Ka Dhexeeya Al-Shabaab, Al-Qaacida iyo Xuutiyiinta? .......... 34**

Xiriirka Taariikhiga ah ee Ka Dhexeeya Al-Shabaab iyo Al-Qaacida 34

**12. Xiriirka Soo If-baxaya ee Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta .......... 36**

Khilaafaadka Gudaha: Garabka Adag iyo Garabka Waaqac-la-noolkaah .......... 36

**13. Maxaa Laga Fahmi Karaa Isbeddellada Soo Noqnoqda ee Kooxda? .......... 38**

**14. Isbeddelka Al-Shabaab Ma Yahay Mid Gaar Ah? Aragti Isbarbardhig ah .......... 39**

**15. Istiraatiijiyad Mise Qasab? Miisaamidda Caddeymaha 40**

**16. Gunaanad .......... 42**

# Soo Koobid

Daraasaddan waxay falanqayn ku samaynaysaa isbeddelladii istiraatiijiyadeed iyo kuwa xeeladeed ee dhawaanahan ku yimid Al-Shabaab, Iyadoo ku doodaysa In sii jiritaanka kooxda ee labaatanka sanno aysan cudud millatari oo kaliya ahayn, ee ay tahay kooxda oo awood u yeelatay In ay la qabsato Isbeddelada millatari, siyaasad, bulsho, Iyo kuwa dhaqaale.Al-Shabaab waxay si tartiib tartiib ah uga guurtay hab ku dhisnaa qabsashada dhulalka iyo dagaallada tooska ah ee caadiga ah, una wareegtay istiraatiijiyad ku salaysan "dagaal muddo dheer soconaya", taas oo diiradda saarta daalinta cadowga iyo ku shaqaynta dulqaad istiraatiiji ah. Intii uu waqtigu socday, kooxdu waxay si weyn u horumarisay awooddeeda dhinacyada sirdoonka, isgaarsiinta, maamulka iyo maaliyadda, iyadoo ka faa'iidaysanaysa tiknoolajiyadda, internet-ka iyo shabakadaha taleefannada gacanta una sii waddo hawlaheeda. si ay isugu dabbariddo.

Dhanka hawlgallada, kooxdu waxay ka leexatay weerarradii waaweynaa ee joogtada ahaa iyo kuwii aan kala sooca lahayn ee lagu beegsan jiray dadka rayidka ah, iyadoo si sii kordhaysa diiradda u saartay bartilmaameedyada militariga iyo dowladda, oo ay ku jiraan kaabeyaasha muhiimka ah. Hawlgalladeeda waxay ku dhisan yihiin ururin xogeed oo faahfaahsan, qorshayn muddo dheer ah, lama filaan iyo adeegsiga awood ciidan oo xooggan si loo helo faa'iido xeeladeed oo degdeg ah iyo guusha dagaalka.


Marka laga soo tago goobta dagaalka, Al-Shabaab waxay xoojisay qaab-dhismeedyadeeda maamul. Waxay horumarisey nidaamyadeeda canshuuraha, maxkamadaha, waxbarashada, caafimaadka iyo adeegyada biyaha, iyada oo ujeeddadeedu tahay inay sii xoojiso saameynteeda isla markaana ay hesho heer ka mid ah aqbalaadda bulshada. Kooxdu waxay sidoo kale odayaasha dhaqanka iyo culimada deegaanka ku dartay qaabkeeda maamul, iyadoo samaysay gole odayaal dhaqameed iyo gole culimo si loo yareeyo masaafada u dhaxeysa kooxda iyo bulshada deegaanka, loona xoojiyo sharciyadda ay bulshada kaga dhex muuqato. Si taa lamida, Alshabaab waxa ay hindistay nidaam xukun oo daahsoon, iyagoo hoggaanka reeraha iyo wakiilada ay aqoonsantahay dowladda federaalka ah ka howlgalinaaya halka ay dowladdu ka arrimiso.Samaynta goleyaashan waxay ka tarjumaysaa labada tiir ee qarniyada badan saldhigga u ahaa nidaamka bulsho ee Soomaaliyeed, kuwaas oo kala ah awoodda dhaqanka iyo awoodda diinta.

> **Al-Shabaab waxay isu beddeshay urur isku-dhafan oo mideeya dagaal hubeysan, maamul, ururinta dakhliga, doorka garsoorka, saameyn bulsho, iyo hawlo warbaahineed.**

Sidaas darteed, xiriirka kooxda iyo bulshada deegaanka wuxuu ka soo gudbay mid ku dhisnaa cabsi gelin oo keliya, wuxuuna isu beddelay isku dhaf ka kooban qasab, bixinta adeegyo, faafin fikradeed iyo dhexgal bulsho. Jawigan, oo ay weheliyaan shaqo la'aanta baahsan, saboolnimada joogtada ah iyo abaarta soo noqnoqota, ayaa hoos u dhigay caqabadihii hortaagnaa qorista xubnaha cusub, isla markaana fududeeyay faafitaanka aragtiyaha iyo sheekooyinka ay Al-Shabaab bulshada dhexdeeda ku faafiso.

Dhanka qaab-dhismeedka iyo maaliyadda, Al-Shabaab waxay gaadhay heer biseyl oo aad u sarreeya. Waxay haysataa kayd dhaqaale oo weyn oo awood u siin kara inay maalgeliso hawlaheeda sannado badan. Caddeymaha la heley intii ay socotey daraasaddan waxay muujinayaan jiritaanka garab ku dhex jira kooxda oo u janjeedha pragmatism ama dabacsanaan siyaasadeed, kaas oo xaalado ku habboon marka la helo laga yaabo inuu tixgeliyo dabciyeynta ama xitaa ka tanaasulka xiriirka rasmiga ah ee kala dhexeeya Al-Qaacida, haddii taa lagu beddelanayo faa'iidooyin siyaasadeed oo waaweyn oo lagu gaadho wadaxaajood. Inkastoo xiriirka kooxda iyo Al-Qaacida uu si isa soo taraysa u noqday mid astaameed iyo fikradeed, haddana Al-Shabaab waxay u muuqataa inay mudnaanta siinayso xiriirrada ku salaysan danaha iyo waaqaca hadba jira, sida iskaashiga soo ifbaxaya ee militari iyo saad ee ay la yeelanayso Xuutiyiinta.

Daraasaddu waxay gunaanadaysaa in Al-Shabaab isu beddeshay urur isku dhaf ah oo mideeya dagaalka hubaysan, maamulka deegaanka, ururinta dakhliga, doorka garsoorka, saamaynta bulshada iyo hawlaha warbaahinta. Ujeeddadeeda ugu weyn ma aha ku dhegganaanshaha adag ee mabda'a fikradeed, balse waa badbaadada ururka, ilaalinta hantida maaliyadeed iyo xoojinta awooddeeda ciidan, xitaa haddii taasi ay u baahan tahay isbeddello fikradeed ama samaysashada xulufo cusub. Natiijooyinka daraasaddu waxay muujinayaan in inta badan isbeddellada waaweyn ay ahaayeen jawaabo ka dhashay cadaadisyo dibadda uga yimid, hase yeeshee Al-Shabaab waxay si isa soo taraysa ugu guulaysatay inay cadaadisyadaas u beddesho fursado istiraatiiji ah, taas oo ka dhigaysa xiriirka ka dhexeeya labada arrimood mid ku socda xariiq isdaba-joog ah halkii uu ka ahaan lahaa laba doorasho oo iska soo horjeeda. Mustaqbalka kooxda waxa uu ku xirnaan doonaa awooddeeda la qabsi ee isbeddellada gudaha Soomaaliya, xaaladaha gobolka iyo kan caalamka ee isbedbeddelaya.



# 1. Hordhac

Daraasaddan waxay baareysaa mid ka mid ah dhinacyada muhiimka ah ee horumarka amniga Soomaaliya iyo guud ahaan Geeska Afrika. Muddo ku dhow labaatan Sanno, Al-Shabaab waxay muujisay adkaysi iyo karti ay kula qabsan karto isbeddellada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee isa soo taraya. Kooxdu kuma koobna hal nooc oo dagaal ama qaab maamul oo gaar ah, balse waxay si joogto ah u soo bandhigtaa dabacsanaan istiraatiijiyad iyo mid xeeladeed. Sidaa darteed, falanqaynta "isbeddelka Al-Shabaab" ma aha oo keliya in la eego falalka ay maanta samaynayso, balse sidoo kale waxay u baahan tahay in la fahmo sida ay uga falceliso cadaadisyada kala duwan ee ka imaanaayadhinacyada siyaasadda, militariga iyo bulshada.

Marka dib loo eego taariikhda ururka, Al-Shabaab waxay ku bilaabatay unugyo hubaysan oo ku tiirsanaa dagaal toos ah iyo qabsashada iyo gacan ku siihaynta dhulalka ay qabsadaan, balse si tartiib tartiib ah ayay ugu gudubtay istiraatiijiyado kala duwan oo isku dhafan. Taasi waxay ka mid tahay sababaha ugu waaweyn ee sii adkeeyey jiritaanka kooxda inkastoo ay la kulantay cadaadisyo militari iyo siyaasadeed oo xooggan. Ururku wuxuu garwaaqsaday in guusha dagaalku aysan ku xirnayn oo keliya awood ciidan, balse ay ku xiran tahay kartida uu u yeesho adkaysiga, samirka iyo beddelidda hab-dhaqankiisa marka ay Xaaladda cakirantahay. Sidaa awgeed, Al-Shabaab waxay qaadatay istiraatiijiyad ku dhisan "dagaal muddo dheer soconaya", taas oo ujeeddadeedu tahay daalinta cadowgeeda halkii ay ka raadin lahayd guul degdeg ah oo kama dambays ah oo lagu gaaro iska horimaad toos ah.

Isbeddellada xeeladeed ee Al-Shabaab ayaa sidoo kale door muhiim ah ka qaatay sii jiritaankeeda. Halkan, xeeladdu kuma koobna oo keliya noocyada hubka la adeegsado, balse waxay sidoo kale ka kooban tahay hababka isgaarsiinta, ururinta xogta sirdoonka, maamulka gudaha iyo xitaa sida ay u maamusho dhaqaalaheeda. Al-Shabaab waxay si ballaaran uga faa'iidaysatay tiknoolajiyadda casriga ah, gaar ahaan internet-ka iyo aaladaha isgaarsiinta, si ay u ballaariso saameynteeda, u fududayso isku dubbaridka howlaha xubnaheeda isla markaana u kordhiso saamaynta saykoolajiyadeed/ kasmonafeedee ay ku yeelato bulshada iyada oo adeegsanaysa hawlgallo warbaahineed oo casri ah. Arrintani waxay muujinaysaa in ururku aanu ku koobnayn hababka asal-raaca ah ee dagaalka, balse uu si joogto ah ula jaanqaado horumarka tiknoolajiyadeed ee caalamiga ah.


Dhanka istiraatiijiyadda, Al-Shabaab waxay muujisay isbeddel muuqda oo ku saabsan habka ay ula dhaqanto maamulka iyo bulshada. Hore, ururka waxaa lagu yaqaanay hawlgallo waaweyn oo aan si cad u kala soocin bartilmaameedyada, hase yeeshee maanta waxaa muuqata in mararka qaarkood uu isku dayayo inuu xaddido tallaabooyinka si toos ah u saameeya dadka rayidka ah, gaar ahaan deegaannada uu doonayo inuu ku yeesho saameyn waarta. Tani waxay qayb ka tahay istiraatiijiyad cusub oo ujeeddadeedu tahay kasbashada ama sii haynta taageerada bulshada, maadaama ururku uu garwaaqsaday in shacabka rayidka ahi yihiin il muhiim ah oo laga helo dhaqaale, xog iyo difaac. Sidaa darteed, isbeddelka istiraatiijiyadeed ee Al-Shabaab wuxuu ku dhisan yahay isku darka qasbid/ cabsigelin iyo kasbashada taageerada bulshada.

Intaa waxaa dheer, Al-Shabaab waxay si weyn u horumarisay qaab-dhismeedkeeda gudaha. Kooxdu waxay u shaqaysaa si nidaamsan, iyadoo leh hannaan maamul, habab ururinta canshuuraha iyo nidaamyo lagu maamulo deegaannada ay ka taliso. Horumarkan maamul wuxuu muhiim u yahay istiraatiijiyadda guud ee ururka, maadaama uu siinayo saameyn dhaqaale iyo mid bulsho oo sii xoojinaysa adkaysigooda.

Siyaasadda gudaha Soomaaliya, oo lagu yaqaano khilaafaadka iyo loollanka ka dhex jira madaxda siyaasadeed, waxay abuurtay firaaq amni oo ay ka faa'iidaystaan kooxaha hubaysan. Taariikh ahaan, ururro ay ka mid tahay Al-Shabaab waxay si xirfad leh uga faa'iidaysteen jawiyada siyaasadeed ee aan degganayn. Siyaasiyiinta waxa ay waqtigooda isugu geeyaan hagidda natiijooyinka doorashooyinka halkii ay gaari lahaayeen go›aanno amni oo jiritaanka qaran taabanaaya; iyadoo siyaasadaynta hay›adaha amniga na ay ka macaashi doonaan koox yar, iskaba daa qaran e; halka maqnaanshaha maamul amni oo hufan mararka qaarkood si ula kac ah loo abuuro si ay dadka qaar lacag uga sameeyaan halkii laga dhiirangalin lahaa xirfadaqoonnimada, hufnaanta Iyo Islaxisaabanka. Arrimahan oo ay weheliso maqnaanshaha hannaan siyaasadeed oo sharciyad leh oo hagaya jihada siyaasadeed ee Soomaaliya, ayaa saameyn ku leh istiraatiijiyadda iyo qorshayaasha Al-Shabaab.

Dhanka kale, isbeddellada caalamiga ahi waxay qaabeeyaan istiraatiijiyadda iyo xeeladaha Al-Shabaab. Colaadaha Bariga Dhexe iyo Yurubta Bari, iyo sidoo kale loollanka u dhexeeya quwadaha waaweyn, waxay abuuraan fursado iyo caqabado isku mar ah. Tusaale ahaan, khalkhalka ku yimaadda suuqyada hubka, baahsanaanta tiknoolajiyadda iyo isbeddellada siyaasadda caalamiga ahi waxay saameyn ku yeelan karaan awoodda Al-Shabaab ay ku hesho kheyraadka, ku dhisato shabakadaha xiriirka iyo ku kasbato taageero. Sidaa darteed, ururku ma aha mid ka go'doonsan nidaamka caalamiga ah, balse si dadban ayuu qayb uga yahay.

Waxaa sidoo kale muhiim ah in la garwaaqsado in isbeddellada Al-Shabaab aysan mar walba noqon kuwo muuqda ama degdeg ah. Mararka qaarkood, isbeddelku wuxuu u dhacaa si tartiib tartiib ah, isagoo ka tarjumaya casharrada laga bartay khaladaadkii hore iyo la qabsiga cadaadisyada cusub. Arrintani waxay adkaynaysaa saadaalinta jihada mustaqbalka ee ururka, maadaama uu awood u leeyahay inuu qariyo qorshayaashiisa isla markaana si lama filaan ah u beddelo habka uu u shaqeeyo.



# 2. Habraaca Cilmi-baarista

Daraasaddan waxay adeegsanaysaa hab cilmi-baariseed tayo-ku-dhisan (qualitative research methodology), kaas oo ku salaysan xogaha laga helay ilaha Machadka Saldhig, wareysiyo lala yeeshay shakhsiyaad leh aqoon qoto dheer oo ku saabsan Al-Shabaab, gaar ahaan xubno muddo dheer ka tirsanaa kooxda, iyo falanqayn istiraatiijiyadeed oo heerar kala duwan leh, taas oo isku darsanaysa dhinacyada qaab-dhismeedka, awoodaha iyo arrimaha nafsiyadeed ee xubnaha kooxda. Habkan ayaa soo saaraya aragtiyo ka baxsan mala-awaallada caanka ah, isla markaana iftiiminaya dhinacyo inta badan ay iska Indhotiraanfalanqeeyeyaasha.

Natiijooyinka daraasaddu waxay muujinayaan in Al-Shabaab ay muddo dheer ku sii jirtay istiraatiijiyad ku dhisan la qabsiga duruufaha isbeddelaya, ilaalinta awoodaha asaasiga ah iyo isku darka halganka hubaysan iyo maamulka bulshada. Tani waxay u suurtagelisay kooxda inay u adkaysato cadaadis militari oo joogto ah iyadoo isla markaas sii haysatay heer saameyn oo joogto ah.

## Xog aruurin/wareysiyo.

Xogta aasaasiga ah ee daraasaddan waxaa lagu ururiyey wareysiyo lala yeeshay ilo sirdoon iyo khubaro aqoon u leh Al-Shabaab. Dadka uu wareystay Machadka Saldhig waxaa ka mid ahaa ku dhowaad darsin mas'uuliyiin ah oo hadda ama hore uga tirsanaa Al-Shabaab, kuwaas oo haya ama soo qabtay xilal leh saameyn istiraatiijiyadeed oo ku saabsan jihada iyo qaabeynta ururka. Dadkan ayaa bixiyay aragtiyo gudaha ah oo la xiriira qaab-dhismeedka ururka, xeeladaha uu ku adeegsado goobaha dagaalka, hababka maamulkiisa iyo xiriirka uu la leeyahay bulshada deegaanka, mabda'a iyo manhajyada lagu hago xubnaha, iyo sidoo kale isbeddelladii ku dhacay kooxda sannadihii u dambeeyay.

Wareysiyada waxaa loo qaaday qaab furan si looga fogaado in jawaabaha lagu koobo hadallo gaagaaban, loona helo sharraxaado qoto dheer oo ku saabsan sababaha, dhiirrigelinta iyo duruufaha ka dambeeyay dhacdooyinka la baarayo.

## Gorfeyn

Xogta laga helay wareysiyada waxaa lagu sameeyay falanqayn istiraatiijiyadeed oo ka kooban saddex heer oo isku xiran. Heerka muuqda wuxuu diiradda saarayaa falalka sida tooska ahloo arki karo sida weerarrada, isu imaatinnada dadweynaha, khudbadaha iyo fulinta xukunnada maxkamadaha. Heerka qaab-dhismeedku wuxuu baarayaa nidaamyada ururka, kala sarreynta gudaha iyo hababka uu ku shaqeeyo. Halka heerka saykoolajiyadeed na uu sahminaayo fikradaha, sheekooyinka iyo aaladaha cabsi-gelinta iyo qancinta ee ay kooxda adeegsato.

Habkan falanqayneed ee heerarka badan leh ayaa u suurtageliyay daraasadda inay ka gudubto sharraxaadda waxa dhacay oo keliya, una gudubto fahamka sababta ay wax u dhaceen iyo sida loo fasiri karo.

## Isbarbardhig Waqtiyeed

Daraasaddu waxay sidoo kale sameysey isbarbardhig waqtiyeed oo daboolaya marxaladihii kala duwanaa ee horumarka Al-Shabaab, iyadoo diiradda la saarayo marxaladdii hore, heerarkii dhexe iyo shantii sano ee u dambeysay. Isbarbardhiggan ayaa muujinaya joogteynta iyo isbeddelka labadaba, isagoo kala caddeynaya astaamaha istiraatiijiyadda iyo qaab-dhismeedka Al-Shabaab ee sii jiray iyo kuwa la waafajiyey ama la beddelay.

## Ilaalinta xogta, Anshaxa iyo badqabka Ila xogta

Maadaama cilmi-baaristu ku tiirsan tahay xog laga helay shakhsiyaad ku nool deegaannada ay Al-Shabaab maamusho, isla markaana mararka qaarkood ay xogtu ka timaaddo xubno ka tirsan ururka laftiisa, waxaa si gaar ah loo tixgeliyey ilaalinta xogta iyo amniga ilaha. Waxaa la hubiyey inaan xogta si buuxda loo shaacin iyada oo aan la helin oggolaanshaha bixiyaha xogta, waxaana si taxaddar leh loo kala saaray xaqiiqooyinka la xaqiijiyey ee ka jira goobta, aragtiyaha shakhsiga ah iyo qiimeynta ay sameeyeen isha ama uruuriyaha xogta.

Dhammaanqaybahaas ayaa muhiim u ah xaqiijinta in daraasaddu ay waafaqsan tahay anshaxa cilmi-baarista isla markaana ay noqoto mid lagu kalsoonaan karo oo ay ka faa'iidaysan karaan akhristayaasha doonaya faham sax ah oo ku saabsan Al-Shabaab iyo kooxaha la midka ah.

Iyadoo la isu gaynaayo xogaha sugan, waayo-aragnimada xubnihii hore ee kooxda, falanqayntaistiraatiijiyadeed oo heerar kala duwan leh iyo isbarbardhig waqtiyeed, daraasaddu waxay soo bandhigaysaa sawir dhammaystiran oo aan ku koobnayn hal dhinac oo keliya. Waxay ku doodaysaa in xal waara oo lagaga gudbi karo caqabadda Al-Shabaab la heli karo oo keliya marka falanqayntu ka gudubto fahamka dusha sare ku kooban, loona gudbo faham qoto dheer oo ku saabsan habka ay kooxdu u fikirto, sida ay u habaysan tahay iyo waxa u suurtageliyey sii jiritaankeeda muddada dheer.

Daraasaddu waxay sidoo kale xoojinaysaa muhiimadda ay leedahay fahamka xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Al-Qaacida, iyo maaraynta xiriirkaas istiraatiijiga ah, si aan si aan ula kac ahayn loogu abuurin kooxo cusub ama colaad hor leh oo aan natiijo waarta lahayn.

Ugu dambayn, daraasaddan, oo lagu doodi karo inay tahay tii ugu horreysay ee qaabkan gaarka ah loo diyaariyo, waxay ku salaysan tahay xaqiiqada ah in Al-Shabaab ay tahay urur firfircoon oo istiraatiijiyaddiisa iyo xeeladihiisu si joogto ah isu beddelaan. Sidaa darteed, dadaal kasta oo dhab ah oo lagu saadaalinayo jihada mustaqbalka ee kooxda waa inuu isku daraa falanqaynta xaaladaha gudaha Soomaaliya, sida dhaqaalaha, isbeddellada bulshada iyo xaaladda amniga, iyo qiimeynta isbeddellada caalamiga ah ee qaabeeya deegaanka ay kooxdu ku shaqayso. Sidaas awgeed, daraasaddu waxay si gaar ah diiradda u saaraysaa sida Al-Shabaab ay sannadihii u dambeeyay u beddeshay hababka dagaalka, maamulka iyo ka faa'iidaysiga tiknoolajiyadda, iyo waxa ay isbeddelladani ka dhigan yihiin marka la eego mustaqbalka kooxda.

# 3. Maxaa Iska beddelay Istiraatiijiyadda Al-Shabaab Sannadihii u Dambeeyay?

Haddii si gaar ah loo eego shantii sano ee u dambeysay, waxaa muuqata in Al-Shabaab ay gashay marxalad isbeddel istiraatiijiyadeed oo taabanaya dhinacyo badan oo ay ka mid yihiin kuwa militari, siyaasadeed, dhaqaale iyo nafsiyadeed. Isbeddelladan kama dhalan hal sabab oo keliya, balse waxay ka yimaadeen isku darka qorshayaal ay kooxda lafteedu dejisay iyo duruufo cusub oo ku khasbay inay la qabsato xaaladaha isbeddelaya. Dhaqdhaqaaq kasta oo hubaysan oo muddo dheer jiray waxaa qasab ku noqota inuu si joogto ah dib ugu qiimeeyo habka uu u shaqeeyo si uu u gaaro yoolashiisa, waana mabda' istiraatiijiyadeed oo aasaasi ah oo laga dheehan karo ururrada hubaysan ee dunida oo dhan.

Marka laga eego dhinaca istiraatiijiyadaha ay kooxdu adeegsato, Al-Shabaab waxay si joogto ah ula qabsataa isbeddellada ku yimaadda xaaladaha dagaal iyo siyaasadeed. Sidaa darteed, hab-dhaqankeeda muddadii shanta sano ahayd waxaa si weyn u qaabeeyay dhowr arrimood oo muhiim ah.

Mid ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan waa isbeddellada ku yimid waajibaadka ciidamada Midowga Afrika ee ka hawlgala Soomaaliya, kuwaas oo ka soo wareegay AMISOM una gudbay ATMIS, haddana loo beddelay AUSSOM. Markasta oo qaabka iyo magaca howlgalka la beddelo, habka ay kooxdu u shaqayso ayaa isna isbeddela. Arrintani waxay ku khasabtay kooxda inay dib u eegto xeeladaha ay u adeegsato difaaca deegaannadeeda ama fulinta weerarrada. Isla mar ahaantaana, go'aan kasta oo lagu beddelayo magaca ama qaab-dhismeedka howlgalka wuxuu kooxda ku abuuraa aragti ah in dagaalku ku dhow yahay dhammaadkiisa isla markaana ciidamada shisheeye ay isu diyaarinayaan bixitaan. Tani waxay ku riixdaa Al-Shabaab inay xoogga saarto isla markaana kordhiso weerarradeeda iyo awooddeeda militari ee ka dhanka ah Ciidamada Xoogga Dalka Soomaaliyeed, si haddii ciidamada shisheeye baxaan ay uga tagaan ciidan qaran oo aan lahayn awood ku filan oo uu si wax ku ool ah isku difaaco[1].

Qodob kale oo muhiim ah wuxuu ahaa gulufkii militari ee ay dowladda Soomaaliya billowday sannadkii 2022 ee ka dhanka ahaa deegaannada ay maamusho Al-Shabaab iyo weerar-celintii ay kooxdu qaaday. Mar kasta oo cadaadiska militari ee saaran ururka kordho, wuxuu beddelaa qaabka uu dagaalka u maareeyo; tusaale ahaan, wuxuu u leexdaa xeeladaha dagaalka dhuumaalaysiga ah, weerarrada degdegga ah, ku dhufo ka dhaqaaq, iyo habab kale oo la mid ah[2].

Sannado badan, Alshabaab waxa ay kooxda dhexdeeda iyo taageerayaashooda ba ka gadayeen dacaayad ah; in ciidamada shisheeye ay yihiin caqabadda dhabta ah ee ka hortaagan hanashada maamul ee dalka, halka taa beddelkeed ay aad ugu fududaan lahayd u babacdhigidda ciidamada Soomaaliya, ayna soo afjari lahaayeen muddo kooban gudahood. Balse, gulufkii dagaal ee 2022 lagu qaaday ayaa beeniyay aragtidaas.

1 Sarkaal ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, Febraayo 2026.

2 Qorshaynta amniga qaran ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, 2022; oo waafaqsan qaab-dhismeedka lagu dhigay Hab-dhismeedka Amniga Qaranka iyo istaraatijiyadda hawlgalka ee lala dagaallamayo Al-Shabaab. Sannado badan, Al-Shabaab wuxuu ku faafinayay xubnihiisa iyo taageerayaashiisa sheeko ah in ciidamada shisheeye ay yihiin caqabadda kaliya ee ka hor istaagaysa inay la wareegaan gacan-ku-haynta dalka oo dhan, iyo in ciidamada Soomaaliyeed oo keligood aysan awoodi doonin inay iska caabbiyaan xitaa muddo gaaban. Si kastaba ha ahaatee, ololihii 2022 wuu caqabad ku noqday oo dhaawacay sheekadaas muddada dheer socotay.

Labo qodobba waxa ay mudanyihiin u kuurgal: xiriirka muujinta oo kaliya ku dhisan iyo hoggaanka Alshabaab oo mar waliba carrabaaba Alqaacidda, taa oo u muuqata arrin aan la is qabadsiin karin. Muddadii Diiriye uu joogay, waxaa sare u kacay ka hadalka Alqaacidda, inkastoo saameyntoodii maamul uu hoos u dhac ku yimid. Carrab ku haynta Alqaacidda waa iska uun afka baarkiisa, qiimo weynna uguma fadhido kooxda. Waxa ay kaliya ka caawisaa in ay isku hayso xubnaha mayalka adag, iyadoo ay sidoo kala na ku ilaashadaan sumcaddooda “Jihaadnimo”. Taas beddelkeed, go’aanada kooxda ma aha dibad-ka-keen, oo waxaa inta badan ka qeyb noqda xubno aan aydiyoolajiyad diimeed wadin.

Marka arrin sidaa yahay, waxa ay kooxdu sheeganayso (Alqaacidda) iyo go’aanada ay gaarayso ma aha kuwo iska hor imaanaaya, ee taa beddelkeed waa kuwo iskabaaya. Sheegashada Alqaacidda waxaa lagu maareeyaa siyaasadaha gudaha ee kooxda, halka go’aanada kooxdu na ay ku salaysanyihiin “maxaa suurtagal ah” (pragmatism). Waxa ay isdiiddo ka taagan tahay sheegashada kooxda ee ah in ay xambaarsanyihiin yoolasha Alqaacidda iyo ficillada dhabta ah ee kooxda, oo isugu soo biyo-shubtay: badbaado, lacag samayn, iyo diirad saaridda gacan ku dhigista Soomaaliya. Inkastoo aragtidani lagu qanci karo, tafsiirka ugu taageerada badan ee caddaymaha wata waxaan u qaadanaynaa mid ay sarrayso suurtagalnimadiisa, balse aan gaarsiisnayn hubaal.

Dhanka bulshada, abaabulkii beelaha deegaanka ee la dagaallanka Al-Shabaab ayaa abuuray jawi istiraatiijiyadeed oo cusub. Marka colaadda ay noqoto mid ay bulshada deegaanku si toos ah uga qaybqaadato, waxaa kooxda ku adkaata inay sii haysato taageerada ama gacan ku haynta deegaannada qaarkood. Bilowgii howlgalka 2022, Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa hormuud ka ahayd iyadoo aanay ATMIS si toos ah hoggaaminayn, taasina waxay horseedday samaysanka ciidamada Macawiisleyda, kuwaas oo markii dambe loo bixiyay Ciidamada Difaaca Deegaanka. Isbahaysigan ballaaran wuxuu sababay in Al-Shabaab ay lumiso dhulal badan oo ku yaalla inta badan gobollada Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe.

Kororka duqeymaha cirka ee Mareykanka ayaa isna saameyn yeeshay, gaar ahaan wixii ka dambeeyay sannadkii 2017, markii maamulkii Trump uu Soomaaliya u aqoonsaday goob dagaal oo firfircoon, taas oo siisay Taliska Ciidamada Mareykanka ee Afrika (AFRICOM) dhiirranaan dheeraad ah oo uu ku fulin karo duqeymo cirka ah isaga oo aan u baahnayn oggolaansho heer sare ah. Tani waxay horseedday in intii u dhaxaysay 2017 iyo 2021 la fuliyo in ka badan laba boqol oo duqeyn cirka ah, taas oo ka badan saddex jibbaar wadarta duqeymihii ay fuliyeen maamulladii Bush, Obama iyo Biden marka la isku daro[3]. Duqeymaha Mareykanka iyo sidoo kale ku biirista Turkiga[4] ee hawlgallada cirka ee ka dhanka ah kooxda ayaa wax ka beddelay qaab-dhismeedka hoggaanka iyo hababka dhaqdhaqaaqa ee hawlgallada hubaysan, maadaama hoggaamiyeyaasha iyo saldhigyada muhiimka ahi ay noqdeen bartilmaameedyo mudnaan gaar ah leh[5].

3 New America (2026), Dagaalka Soomaaliya: Tirakoob Toos ah.
4 Xubin sare oo ka tirsan Al-Shabaab, Shabeellaha Dhexe, Janaayo 2026.
5 Xubin ka tirsan jabhadda Al-Shabaab, Janaayo 2026.

Qodob kale ayaa ah xiriirka la soo wariyay ee ka dhexeeya Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab, kaas oo falanqeeyayaal badan u arkaan inuu qayb ka yahay shabakad ballaaran oo isku xirta kooxaha hubaysan ee gobolka. Xiriirkani wuxuu saameyn ku yeelan karaa dhinacyo farsamo sida helitaanka hubka, tababarka ama maalgelinta[6].

Masiibooyinka dabiiciga ah sida fatahaadaha iyo abaaraha ayaa iyaguna wax ka beddela xaaladaha bulsho iyo dhaqaale, taas oo si dadban u saameysa dhaq-dhaqaaqa kooxaha hubaysan, gaar ahaan marka kooxahani isku dayaan inay kasbadaan taageerada bulshada iyaga oo bixinaya gargaar iyo adeegyo aasaasi ah oo ay caadiyan dowladdu masuul ka tahay. Muddooyinkii u dambeeyay, arrintani waxay horseedday in Al-Shabaab ay si xeeladaysan iyo istiraatiijiyad ahaanba uga faa'iidaysato saameynta isbeddelka cimilada.

Marka la isku geeyo, isbeddelladani waxay muujinayaan in Al-Shabaab ay ku jirto marxalad ay si joogto ah ula qabsanayso xaaladaha isbeddelaya. Fahamka isbeddelladan iyo dhaqdhaqaaqyadan ayaa muhiim u ah cid kasta oo doonaysa inay si qoto dheer u falanqeyso mustaqbalka amniga iyo istiraatiijiyadda gobolka.



6 Xubin ka tirsan Xafiiska Farsamada ee Al-Shabaab, Abriil 2026.

# 4. Sidee Ayay Isu Beddelleen Hawlgallada Militari ee Al-Shabaab?

Marka la eego colaadda daba dheeraatay ee Soomaaliya ka jirta, waxaa muuqata in Al-Shabaab ay si joogto ah u horumariso oo u casriyeyso xeeladaha ay ku fuliso weerarradeeda. Guud ahaan, dhaqdhaqaaqyada hubaysan ee muddada dheer jira waxay ku dhaqmaan hal mabda' oo muhiim ah, kaas oo ah in badbaadada ururku ay ku xiran tahay awooddiisa uu kula qabsan karo goob dagaal oo si joogto ah isu beddelaysa. Sidaa darteed, Al-Shabaab waxay isku darsataa xeeladaha militari, dagaalka nafsiyadeed iyo qorshaynta istiraatiijiyadeed si ay u kordhiso fursadaha guusha ee hawlgalladeeda. Kooxdu waxay si joogto ah u adeegsataa walxaha qarxa, weerarrada isku dhafan ee heerar kala duwan leh iyo bartilmaameedyo si taxaddar leh loo doortay, si loo wiiqo awoodda dowladda iyo ciidamada xulafada la ah[7].

Inkasta oo aysan jirin isbeddello aasaasi ah oo ku yimid hababka iyo xeeladaha guud ee ay adeegsato, haddana waxaa la sameeyay horumarin muuqata. Intii u dhaxaysay sannadihii 2008 iyo 2021, Al-Shabaab waxaa lagu yaqaanay weerarro aan kala sooc lahayn oo marar badan sababay khasaare culus oo soo gaara dadka rayidka ah. Hase yeeshee, wixii ka dambeeyay sannadkii 2021, oo ku beegnaa xilligii Taliban[8], oo ah xulafadeeda fikradeed, ay la wareegtay Afghanistan, Al-Shabaab waxay dib u eegis ku samaysay hababka dagaal ee ay ku howlgasho. Taliban, -ha noqoto xaqiiqo ama dacaayad-, waxaa si weyn loogu sawiraa inay inta badan ka fogaatay weerarro ballaaran oo lagu beegsado shacabka rayidka ah, isla markaana ay halgankeedu ku kooban yahay gudaha Afghanistan oo ay u soo bandhigtay sidii halgan qaran. Arrintani waxay ka caawisay inay hesho taageero ballaaran oo bulshada Afgaanistaan dhexdeeda ah.

Kadib sannadkii 2021, Al-Shabaab waxay si isa soo taraysa diiradda u saartay weerarrada ka dhaca jiidaha dagaalka, weerarrada gaadmada ah iyo bartilmaameedyada kaabeyaasha dowladda. Si si wanaagsan loogu fahmo qaabka ay kooxdu u hawlgasho, waxaa muhiim ah in la sharaxo hababka iyo marxaladaha ugu muhiimsan ee ay raacdo marka ay fulinayso hawlgal.

## Xog uruurin xooggan

Hawlgal kasta oo waaweyn wuxuu ka bilaabmaa marxalad dheer oo qarsoodi ah oo lagu ururiyo xogta. Inkasta oo marxaladdan aan si muuqata loo arkin, haddana waxaa lagu tilmaami karaa tan ugu muhiimsan. Al-Shabaab waxay isku darsataa habab kala duwan oo xog ururin ah, iyadoo adeegsanaysa xogta laga helo dad ku sugan ama ku dhow goobta la beegsanayo, sawirro iyo muuqaallo ay soo qaadaan diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, hawlgallo sahamin ah oo ay si qarsoodi ah u fuliyaan kooxo yaryar, iyo weerarro tijaabo ah oo lagu cabbirayo sida ay ciidamada difaacaya uga falcelinayaan[9].

Hannaankan wuxuu u shaqeeyaa sidii cilmi-baaris militari. Marka xog ku filan la ururiyo, qorsheeyayaasha weerarku waxay awoodaan inay qiimeeyaan tirada ciidamada jooga goobta, nooca hubka yaalla iyo qaabka difaacyada loo habeeyey, taas oo si weyn u kordhisa fursadaha guusha. Daraasadaha amniga ayaa muujinaya in kooxaha sida Al-Shabaab oo kale ah ay inta badan ku tiirsan yihiin xogta deegaanka laga helo ama shakhsiyaad ay ku dhex yeesheen goobaha ay bartilmaameedsanayaan si ay u xoojiyaan saameyntooda.

7 Warbixinta COI – Soomaaliya: Xaaladda Amniga, Maajo 2025.
8 Xubin sare oo ka tirsan Guddiga Difaaca ee Al-Shabaab, Febraayo 2026.
9 Centre for Preventive Action (2025), Colaadda Al-Shabaab ee Soomaaliya.

## Diyaarinta ciidanka weerarka fulinaya

Dagaalyahannada loo adeegsado weerarrada waaweyn ma aha ciidamo caadi ah. Waxay maraan tababar adag iyo diyaarinta dhinaca nafsiyadda ah oo socota muddo u dhaxaysa saddex ilaa siddeed bilood. Diyaarintan waxay ku salaysan tahay afar tiir oo muhiim ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin barbaarinta diineed iyo diyaarinta nafsiyeed si dagaalyahanku ugu qanco waxa uu qabanayo, anshaxa iyo nidaamka militariga si loo abuuro kala dambayn, hoggaansamid iyo adeecid aan shuruud lahayn, sare u qaadista niyadda iyo dhiirrigelinta iyadoo dagaalyahanka la barayo inuu hawlgalkiisa u arko waajib diini ah oo horseedaya ajar iyo janno aakhiro, iyo tababar dagaal oo dhammaystiran oo ku saabsan hubka, dhaqdhaqaaqa iyo wada shaqaynta goobta dagaalka si qof kastaa u fahmo doorkiisa, laga bilaabo askariga caadiga ah ilaa taliyaha goobta.

Mudadaas, dagaalyahannada waxaa inta badan laga mamnuucaa isticmaalka taleefannada, mana lagu wargeliyo halka ay ku wajahan yihiin ama nooca hawlgalkooda ilaa daqiiqadaha ugu dambeeya. Natiijada ka dhalata waa ciidan leh isku xirnaan xooggan, anshax sare iyo go'aan adag. Marka laga eego dhinaca nafsiyadeed, dagaalyahanku wuxuu goobta dagaalka ku gala xamaasad iyo rabitaan uu ku gaaro shahaado[10].

## Waqtiga: Aalad Maldahan

Mararka qaarkood, hubka ugu awoodda badan ma aha qori ama walxaha qarxa, balse waa waqtiga. Al-Shabaab si dhif ah ayay u weerartaa fariisimo cusub oo dhawaan la sameeyay. Taa beddelkeeda, waxay sugtaa calaamadaha muujinaya daal iyo dayacaad. Tusaale ahaan, waxay la socotaa haddii ciidamadu muddo dheer ku sugnaayeen saldhigga, heerka isbeddelka fasaxyada ciidamada, waqtiga uu taliyuhu ku qaato magaalooyinka marka loo eego jiidaha hore ee dagaalka iyo heerka hoos u dhaca niyadda ciidamada. Marka xaaladahan ay soo baxaan, saldhiggu wuxuu noqdaa mid nugul. Weerarku wuxuu u muuqan karaa mid lama filaan ah, balse dhab ahaantii waa natiijada istiraatiijiyad ku dhisan sugidda waqtiga ugu habboon[11].

## Kedinta Cadowga

Weerarrada Al-Shabaab waxaa inta badan lagu gartaa curiyaha lama filaanka ah. Xitaa marka ay soo baxaan warar ama tuhuno la xiriira dhaqdhaqaaqyo aan caadi ahayn oo ka socda deegaanka, faahfaahinno badan ayaa weli qarsoon. Taasoo la xiriirta waqtiga saxda ah ee weerarka, bartilmaameedka dhabta ah iyo nooca hawlgalka la qorsheeyay.

Lama filaanku wuxuu leeyahay awood nafsiyadeed oo weyn. Marka askarigu dareemo in weerar dhici karo balse uusan hubin waqtigiisa, maskaxdiisu waxay ku jirtaa cadaadis joogto ah. Muddo ka dib, tani waxay hoos u dhigtaa feejignaanta waxayna dhaawacdaa awoodda go'aan qaadashada[12].

10 Xubin ka tirsan jabhadda Al-Shabaab, Janaayo 2026.
11 Isla tixraacaas
12 Isla tixraacaas

## Adeegsiga awood xad-dhaaf ah

Marka uu weerarku bilowdo, kooxdu waxay adeegsataa awood ka badan inta ay xamili karaan ciidamada difaacaya. Awooddan waxay ka timaaddaa dhowr arrimood oo ay ka mid yihiin niyadda sare ee ciidamada weerarka qaadaya, qorshe cad oo leh jihooyin badan oo weerar iyo qorshayaal kale oo beddel ah, tiro ahaan oo ay ka badan yihiin ciidamada jooga saldhigga, iyo adeegsiga hub culus sida RPG7-, madaafiic, qoryaha B10- ee aan lahayn dib-u-celinta, gaadiidka dagaalka ee tiknikada ah iyo gaadiidka walxaha qarxa laga soo buuxiyo ee loo yaqaan VBIED. Istiraatiijiyadda ku dhisan "adeegsiga awood xad dhaaf ah" waxay marar badan keentaa in difaacyada saldhiggu ay burburaan daqiiqadaha ugu horreeya ee weerarka[13].

## Doorashada Goorta

Inta badan weerarrada waaweyn waxay qaadaan wax yar ka hor salaadda subax. Wakhtigan wuxuu siiyaa laba faa'iido oo dabiici ah. Marka koowaad, askartu waxay ku jiraan xaalad hurdo, waxaana si lama filaan ah uga toosiya qaraxyo iyo rasaas, taas oo dhalisa jahawareer iyo cabsi. Marka labaad, mugdigu laftiisu waa arrin kaloo cabsi dhalisa, maadaama aysan dadka si fudud u qiyaasi karin jihada uu weerarku ka socdo, tirada weeraryahannada ama masaafada u dhexeysa.

Askariga la weeraray wuxuu dareemaa wax u dhow riyo argagax leh oo dagaal, isagoo maqla qaraxyo waaweyn, qaylo, rasaas ka imanaysa mugdiga iyo jahawareer buuxa oo ku saabsan cidda nool, cidda dhimatay, cidda baxsatay, waxa dhacaya iyo halka uu u dhaqaaqi karo. Xilligaas, maskaxdu waxay mudnaanta koowaad siinaysaa badbaadada halkii ay ka siin lahayd dagaalka ama difaaca[14].

## Filashada natiijada

Hawlgallada waaweyn si aan qorshe lahayn looma bilaabo. Kooxdu waxay adeegsataa qiyaas lagu salaynayo suurtagalnimada guusha oo ka dhalata qorshayn iyo qiimeyn taxaddar leh. Haddii xogta iyo qorshaha hawlgalku muujiyaan in fursadda guushu ka sarreyso qiyaastii boqolkiiba sagaashan, hawlgalku wuu bilaabmaa; haddii kale waa la dib dhigaa[15].

Habkan ayaa ka dhigaya weerarrada waaweyn kuwo si qoto dheer loo qorsheeyo. Kooxda waxaa muddo dheer lagu yaqaanay hawlgallo isku dhafan oo dhowr heer leh, kuwaas oo badanaa ku bilowda qaraxyo kadibna ay xigaan weerarro hubaysan.

Marka la soo koobo, xeeladaha Al-Shabaab kuma koobna dagaal toos ah oo keliya. Waxay isku daraan ururinta xogta, diyaarinta nafsiyeed, samir istiraatiiji ah, lama filaanka iyo adeegsiga awood aad u xooggan. Waxa kale oo jira dhinac nafsiyeed oo qoto dheer oo lagu beegsanayo ciidamada difaacaya iyada oo loo marayo cabsi gelin, jahawareerin iyo niyad-jabin.

Fahamka arrimahan ayaa muhiim u ah cid kasta oo doonaysa inay si qoto dheer u fahamto sida ay u shaqeyso mashiinka militari ee kooxaha hubaysan iyo sababta ay mararka qaarkood weerarradoodu u yeeshaan saameyn weyn[16].

13 Isla tixraacaas
14 Isla tixraacaas
15 Taliye sare oo ka tirsan hawlgallada jabhadda Al-Shabaab, Jubbada Dhexe, Maarso 2026.
16 Isla tixraacaas

# 5. Waa Maxay Doorka Tiknoolajiyaddu Ku Leedahay Hawlgallada iyo Istiraatiijiyadda Al-Shabaab?

Marka si dhow loo eego habka uu ururku maanta u shaqeeyo, waxaa muuqata in Al-Shabaab aysan u arkin tiknoolajiyadda wax dheeraad ah oo lagu daray hawlaheeda, balse ay u aragto laf-dhabarta howlaha maalinlaha ah ee ay qabato. Si ay isu soo bandhigto inay tahay hay'ad u shaqaynaysa qaab dowladeed, iyadoo maamusha deegaanno, ururisa dakhliga, fulisa xukunnada maxkamadaha isla markaana faafisa farriimaheeda fikradeed iyadoo adeegsanaysa qasab iyo qancinba, waxay tiknoolajiyadda ku dhex dartay saddex dhinac oo waaweyn oo kala ah maamulka iyo dhaqaalaha, hawlgallada militari iyo sirdoonka, iyo saameynta warbaahineed[17]. Al-Shabaab weli waxay tahay khatarta amni ee ugu weyn Soomaaliya, waxayna sii waddaa la qabsiga tiknoolajiyadaha cusub si ay u xoojiso adkaysigeeda iyo awooddeeda sii jiritaan.

## Adeegsiga Tignoolajiyadda: Isgaarsiinta, Diyaaradaha Aan Duuliyaha Lahayn (Drones), iyo Internet-ka

Dhanka isgaarsiinta, diyaaradaha aan duuliyaha lahayn iyo internet-ka, Al-Shabaab waxay si nidaamsan uga faa'iidaysataa dhammaan heerarka ururka[18]. Dhinaca maamulka, waxay ka faa'iidaysataa ku tiirsanaanta weyn ee Soomaaliya ku qabto taleefannada gacanta iyo lacagaha dijitaalka ah. Tani waxay u suurta gelisaa in amarro, lacag-bixinno iyo isgaarsiin maamul ay si degdeg ah ugu gudbaan marinno aan si fudud loo kormeeri karin. Tusaale ahaan, warbixin uu Machadka Hiraal soo saaray sannadkii 2020 ayaa iftiimisay khataraha amni ee ka dhashay ka faa'iidaysiga Al-Shabaab ee nidaamyada lacagaha moobaylka, taas oo muujinaysa in arrintani aysan ahayn mala-awaal balse ay tahay walaac amni oo la aqoonsan yahay.

Dhanka militariga, kooxdu waxay ku tiirsan tahay isku darka taleefannada, aaladaha ku shaqeeya internet-ka iyo agabyo kale oo loo adeegsado gudbinta amarro iyo xog sirdoon. Arrinta muhiimka ahi ma aha oo keliya in tiknoolajiyadda la isticmaalo, balse waa xaqiiqda ah in urur hubaysan oo casri ahi uusan si wax ku ool ah u shaqayn karin haddii uusan jirin xiriir isgaarsiin oo joogto ah. Dagaalyahan ku sugan goob fog, xog-ogaal ku dhex jira magaalo ay dowladdu maamusho iyo taliye ku dhuumaalaysanaya kayn ama deegaan qarsoon, dhammaantood waxaa isku xira xadhig aan muuqan oo ah isgaarsiinta.

Marka laga hadlayo diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, warbixinno la isku halayn karo ayaa tilmaamaya in Al-Shabaab ay adeegsatay tiro kooban oo diyaarado rayid ah oo ganacsi ahaan loo heli karo, kuwaas oo loo beddelay ujeeddooyin militari, isla markaana lagu tijaabiyey in loo adeegsado qaadista walxaha qarxa, inkastoo isku dayadaas muddada dheer socday aysan guud ahaan guulo muuqda keenin[19]. Kooxdu waxay weli raadineysaa nidaamyo casri ah oo horumarsan, iyadoo isku dayaysa inay ku hesho iibsi ama xulafo cusub, waxaana kuwa ugu muhiimsan ka mid ah Xuutiyiinta Yemen[20].

Marka laga eego dhinaca istiraatiijiyadda, arrintani waxay muujinaysaa qodob muhiim ah, kaas oo ah in tiknoolajiyaddu ay soo gaabinayso masaafada u dhexeysa qorshaynta iyo fulinta. Waxay u saamaxdaa kooxda inay wax aragto, wax maqasho isla markaana gudbiso farriimo ka hor inta aysan cadowgeedu si buuxda uga falcelin.

17 Xubin ka tirsan Xafiiska Farsamada ee Al-Shabaab, Abriil 2026.
18 Paul D. Williams (2024), Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed iyo Al-Shabaab: Qiimayn Isbarbardhig ah.
19 Xubin ka tirsan Xafiiska Farsamada ee Al-Shabaab, Abriil 2026.
20 Machadka Saldhig (2026), Xiriirka Istiraatiijiga ah ee u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta iyo Saamayntiisa Gobolka iyo Amniga Caalamka.

## Farsamooyinka Xog-ururinta Sirdoonka

Dhanka sirdoonka[21], awoodda Al-Shabaab kuma koobna qalabka casriga ah oo keliya, balse waxay adeegsataa isku darka tiknoolajiyadda iyo dhexgalka qotada dheer ee bulshada. Al-Shabaab waxay si weyn u maalgelisaa ku dhex milanka ciidamada ammaanka, hay'adaha dowladda, ganacsatada iyo shacabka si ay u hesho xog sax ah. Qaabkan sirdoon ee ku salaysan ilaha aadamaha ayaa ka khatar badan qalab kasta oo gaar ah, maadaama xogta ugu qiimaha badan ay inta badan ka timaaddo qof wax arkay, wax maqlay ama ku sugan goobaha lagu gaaro go'aannada.

Daraasado laga sameeyay Amniyaadka, oo ah garabka amniga iyo sirdoonka Al-Shabaab, ayaa muujinaya in ururku muddo dheer dhisay nidaam xog ururin oo ballaaran, kaas oo ku salaysan dabagal, cabsi gelin, shabakado basaasnimo oo habaysan iyo mudnaan siinta bartilmaameedyada muhiimka ah. Amniyaadku waa garabka ugu muhiimsan ee ururka, maadaama uu suurtageliyo ama kaalinta ugu muhiimsan ka qaato sii jiritaanka saameynta kooxda, dhexgalka uu ku sameeyo hay'adaha iyo fulinta hawlgallada qarsoon.

Halkaan, tiknoolajiyaddu waxay u shaqaysaa sidii qalab xoojiya awoodda aadanaha halkii ay beddeli lahayd. Taleefannadu waxay gudbiyaan farriimaha, internet-ku wuxuu fududeeyaa xiriirka, diyaaradaha aan duuliyaha lahaynna waxay bixiyaan sawirro iyo muuqaallo, balse dadka gudaha ku jira ayaa xaqiijiya waxa dhab ahaantii dhacaya. Tani waa sababta Al-Shabaab marar badan uga dheereyso cadow ka xoog badan oo ka qalab fiican, maadaama ay si qoto dheer u fahamtay cashar dagaal oo aad u fac weyn, kaas oo ah in "xogtu ay tahay awood, xogta saxda ahina ay tahay kala bar guusha."

Marka laga eego dhinaca nafsiyadda, qaabkan sirdoon wuxuu abuuraa dareen baahsan oo ah in qof kasta uu noqon karo il xogeed ama dhego wax maqla. Arrintani waxay dhaawacdaa kalsoonida gudaha ee hay'adaha waxayna kooxda siisaa faa'iido aan mar kasta lagaga hortegi karin awood ciidan oo keliya[22].

## Ka Faa'iidaysiga Baraha Bulshada iyo Warbaahinta si ay ugudbiso Fariinteeda

Dhanka warbaahinta bulshada iyo guud ahaan hawlgallada warbaahineed, Al-Shabaab waxay daba socotaa laba ujeeddo oo is barbar socda, kuwaas oo kala ah faafinta farriimaheeda iyo qaabaynta saameynta nafsiyadeed. Kooxdu kuma qanacsana oo keliya in codkeeda la maqlo, balse waxay rabtaa in la dareemo jiritaankeeda. Waxay adeegsataa bogag internet, warbaahin xiriir la leh iyo akoonnada warbaahinta bulshada si ay u baahiso sheegashada mas'uuliyadda weerarrada, muuqaallada dagaalka, hanjabaadaha iyo mararka qaarkood farriimo si gaar ah loogu talagalay qaybo gaar ah oo taageerayaasheeda ka mid ah[23].

Tan iyo sannadkii 2022, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay dadaal badan gelisay yareynta raadadka Al-Shabaab ee internet-ka, iyadoo xirtay bogag internet, la shaqeysay shirkadaha baraha bulshada si loo xiro akoonnada faafiya waxyaabaha argagixisada la xiriira, isla markaana si firfircoon uga hortagtay farriimaha kooxda iyada oo adeegsanaysa farriimo ka soo horjeeda[24].

21 Sinko G. iyo Besenyo S. (2023), Ka Badan Badbaado: Doorka Sirdoonka Qarsoon ee Al-Shabaab, Amniyaad, ku leeyahay Ururinta Xogta.
22 Sinko G. iyo Besenyo S. (2023), Ka Badan Badbaado: Doorka Sirdoonka Qarsoon ee Al-Shabaab, Amniyaad, ku leeyahay Ururinta Xogta.
23 Khabiir ku takhasusay warbaahinta Al-Shabaab, Muqdisho, Febraayo 2026.
24 Gilroy, G. (2021), Jiidda Hore ee Internet-ka: Furfuridda Istiraatiijiyadda Baraha Bulshada ee Al-Shabaab.

Inkasta oo ay jiraan dadaallada dowladda, Al-Shabaab waxay weli si xooggan ugu sii jirtaa barahaas. Sannadkii 2024, Xarunta La-dagaallanka Argagixisada ee West Point waxay ku tilmaantay Al-Shabaab inay ka mid tahay kooxihii ugu horreeyay ee Geeska Afrika ee fahmay qiimaha istiraatiijiyadeed ee baraha bulshada, oo ay ku jirto isticmaalka tooska ah ee waqtiga dhabta ah inta ay socdaan dhacdooyinka waaweyn. Daraasaddu waxay muujisay in kooxdu si ula kac ah ugu guurto meelo cusub oo dijitaal ah marka cadaadis lagu saaro marinadeeda warbaahineed ee hore, iyadoo deegaanka warbaahinta u aragta goob dagaal oo u gaar ah.

Dacaayadda Al-Shabaab kuma koobna qorista xubno cusub ama abaabulka taageerayaasha. Waxay ku shaqaysaa dhowr heer. Marka koowaad, kooxdu waxay isku daydaa inay soo bandhigto sawirka urur weli firfircoon, nidaamsan oo leh awood hawlgal. Marka labaad, waxay dacaayadda u adeegsataa cabsi gelinta bulshada, mas'uuliyiinta iyo hay'adaha ay bartilmaameedsanayso. Marka saddexaad, waxay soo jiidataa dadka ka niyad jabay awood darrida dowladda ee dhinacyada adeegyada, caddaaladda iyo amniga. Marka afraadna, waxay si joogto ah u ilaalisaa una xoojisaa sheekada iyo aragtida ay iyadu ka aaminsan tahay jiritaankeeda, si aysan ugu guuldarraysan waxa loo yaqaan "dagaalka macnaha iyo sheekada."

Marka la soo koobo, Al-Shabaab waxay tiknoolajiyadda u isticmaashaa qaab isku dhafan oo ka tarjumaya sida urur hubaysan oo casri ahi u shaqeeyo, iyadoo isku xiraysa maamulka iyo dhaqaalaha, isgaarsiinta iyo hawlgallada, sirdoonka iyo warbaahinta, iyo sidoo kale saamaynta nafsiyeed. Awooddeeda dhabta ahi kuma jirto qalabka laftiisa, balse waxay ku jirtaa sida ay qalabkaas ugu dhex darsato shabakadaha bini'aadamka, nidaamyada urureed iyo ujeeddooyinka istiraatiijiyadeed. Sidaa darteed, fahamka qaabka ay Al-Shabaab u adeegsato tiknoolajiyadda ma aha arrin farsamo oo keliya, balse waa furaha lagu fahmi karo sida ay kooxdu u sii nooshahay, u yeelato saameyn una sii jirto inkastoo ay la kulanto cadaadisyo dibadeed oo joogto ah.



# 6. Sidee Ayay Isku Beddeshay Istiraatiijiyadda Guud ee Al-Shabaab Marka Laga Eego Maamulka, Dagaalka iyo Siyaasadda?

Marka la eego istiraatiijiyadda guud ee Al-Shabaab, sawirka ka muuqdaa waa mid ka adag in lagu koobo hal sifeyn oo keliya. Dusha sare, kooxdu waxay weli ku celcelisaa halkudhigyada iyo yoolalkii ay lahayd tan iyo markii la aasaasay; warbaahinteeda iyo khudbadaha hoggaamiyeyaasheeda kama muuqato ka noqosho rasmi ah oo ku saabsan himilooyinkeeda siyaasadeed iyo militari ee ballaaran. Hase yeeshee, marka laga gudbo hadallada iyo hal-ku-dhegyada oo diiradda la saaro hab-dhaqankeeda, waxaa soo baxaya isbeddello muuqda.

Dhab ahaantii, Al-Shabaab maanta ma aha oo keliya "koox argagixiso oo weerarro fulisa". Waxay isku dayaysaa inay isu soo bandhigto awood dagaallanta, maamusha bulshada, ururisa canshuuraha, xallisa khilaafaadka, weerarro qaadda, dib uga gurata goobaha qaarkood, ka dibna mar kale ku soo noqota. Tani waxay ka tarjumaysaa isbeddel istiraatiijiyadeed oo muhiim ah; himiladii ugu dambaysay ee ay ku dhawaaqaysay isma beddelin, balse jidka lagu gaadhayo himiladaas ayaa noqday mid dabacsan, leh heerar kala duwan, isla markaana si qoto dheer ula jaanqaadaya nafsiyaadka bulshada iyo daalka dagaalka daba dheeraaday.

Tan iyo markii uu billowday gulufkii militari ee sannadkii 2022, gacan ku haynta dhulku waxay ahayd mid si joogto ah isu beddelaysa. Bartamihii sannadkii 2025, Al-Shabaab waxay dib uga soo muuqatay qaybo ka mid ah labada Shabeelle, Hiiraan, Galgaduud iyo Mudug oo ay hore ugu wayday weerarradii dowladda. Sannadkii 2026, dowladda ayaa mar kale guulo waaweyn ka gaadhay Shabeellaha Hoose iyo qaybo ka mid ah Shabeellaha Dhexe, iyadoo ujeeddada ugu weyn ay ahayd xakamaynta marinnada muhiimka ah ee webiga Shabeelle si loo curyaamiyo dhaqdhaqaaqa kooxda[25].

Sidee Ayey Istaraatiijiyadda Kooxdu Iskaga Beddashay Dhinacyada Siyaasadda iyo Milatariga?
Haddii si gaar ah loo kala saaro hadallada rasmiga ah iyo dhaqanka dhabta ah, isbeddelka ugu weyn wuxuu ka muuqdaa dhinaca dambe. Al-Shabaab weli waxay isu soo bandhigtaa inay tahay awood diimeed iyo mid siyaasadeed oo xaq u leh hoggaaminta bulshada, isla markaana u dagaallamaysa "xoraynta" dhulka Muslimiinta. Hase yeeshee, si ay u sii hayso sheegashadaas, waxay ku dhaqaaqday mabda' ay wadaagaan dhammaan kacdoonnada muddada dheer jira, kaas oo ah in bulshada la maamulayo ay qayb ka tahay goobta dagaalka, halkii ay ka ahaan lahaayeen daawadayaal waxa dhacaya.

## Sidee Ayey Istaraatiijiyadda Kooxdu Iskaga Beddashay Dhinacyada Siyaasadda iyo Milatariga?

Haddii si gaar ah loo kala saaro hadallada rasmiga ah iyo dhaqanka dhabta ah, isbeddelka ugu weyn wuxuu ka muuqdaa dhinaca dambe. Al-Shabaab weli waxay isu soo bandhigtaa inay tahay awood diimeed iyo mid siyaasadeed oo xaq u leh hoggaaminta bulshada, isla markaana u dagaallamaysa "xoraynta" dhulka Muslimiinta. Hase yeeshee, si ay u sii hayso sheegashadaas, waxay ku dhaqaaqday mabda' ay wadaagaan dhammaan kacdoonnada muddada dheer jira, kaas oo ah in bulshada la maamulayo ay qayb ka tahay goobta dagaalka, halkii ay ka ahaan lahaayeen daawadayaal waxa dhacaya.

25 Isla ticraacaas

## Qaabka Hawlgal ee Kooxda

Hab-dhaqanka maalinlaha ah ee Al-Shabaab wuxuu muujinayaa laba weji oo is barbar socda; mid ku jihaysan maamulka bulshada, iyo mid sii wada dagaalka. Dhanka maamulka, waxay si xooggan ugu dadaashay inay dadka ku nool meelaha ay saamaynta ku leedahay ka dhaadhiciso inay tahay “dowlad”, ama ugu yaraan beddel ka awood badan qaar ka mid ah maamullada rasmiga ah. Waxay xoojisay bixinta adeegyada iyo maamulka si ay isugu darsato qasab iyo aqbalid bulsho, una hesho laba arrimood oo muhiim ah; adeecid iyo heer ka mid ah aqbalaadda bulshada. Waxay maamushaa nidaamyo canshuureed, maxkamado iyo habab maamul oo saameeya nolol maalmeedka dadka, xitaa meelaha aysan si toos ah u joogin.

### Waxbarashada

Dhanka waxbarashada, waxay samaysaa dugsiyo diini ah iyo kuwo maaddi ahba, kuwaas oo gaara heer ay ugu yeedho “Jaamacad”. Inkasta oo tayada waxbarashadu aysan mar walba sarreyn, haddana ujeeddadu kama koobna gudbinta aqoonta oo keliya, balse waxay ku wajahan tahay qaabaynta jiil cusub oo dhinaca fikirka ah iyo abuurista dareen bulshada ku dhex jira oo ah in uu jiro cid daneenaysa oo adeegyo u fidinaysa.

### Kaabeyaasha Aasaasiga ah, Biyaha iyo Adeegyada Caafimaadka

Dhanka adeegyada aasaasiga ah sida biyaha iyo caafimaadka, magaalooyinka qaarkood waxay ka qayb qaadatay samaynta xarumo caafimaad ama isbitaallo, halka deegaannada miyiga ah ay mararka qaarkood u dirto kooxo caafimaad oo guurguura kuwaas oo sameeya baaritaanno caafimaad isla markaana si bilaash ah u qaybiya daawooyin. Bulshooyinka daalay ee ay dowladdu ka maqneyd, adeegyada caafimaad ee muhiimka ahi waxay kooxda siinayaan saameyn iyo awood ay ku maamusho aragtida bulshada. Kooxdu waxay fududaysaa dadaallada caafimaad ee bulshada, balse iyadu ma samayso maalgelin muuqata oo la taaban karo, maadaama adeegyada badankoodu ay ka yimaadaan bulshada lafteeda, halka Al-Shabaab ay sheegato natiijooyinka ka dhasha. Hab la mid ah ayaa loo adeegsadaa qodista ceelasha, samaynta waraha biyaha iyo dayactirka jidadka.

Iyadoo ka faa’iidaysanaysa maamulidda aragtida bulshada, Al-Shabaab waxay awood u yeelataa inay saameyn ku yeelato ganacsiga, dhaqdhaqaaqa dadka iyo daacadnimada bulshada miyiga iyo xoolo-dhaqatada. Warbixinno caalami ah ayaa xusay in kooxdu ka faa’iidaysato canshuuraha iyo saamaynta ay ku leedahay marinnada muhiimka ah iyo kheyraadka ku yaalla meelaha ay dowladdu ka maqan tahay ama ay daciifka ka tahay[26].

26 https://www.crisisgroup.org/sites/default/files/-2025-01-316fighting-climate-change-somalia_0.pdf

Tani waxay muujinaysaa aragti istiraatiijiyadeed oo qoto dheer; kooxdu waxay fahamtay in rasaastu kaligeed aysan dhul xajin karin, balse waxa dhulka lagu sii hayaa uu yahay isku darka cabsigelin iyo fududaynta adeegyada bulshada.

Caddaaladdu waa laf-dhabarta sheegashada sharciyadeed ee Al-Shabaab. Maxkamad si degdeg ah u xallisa murannada, xitaa haddii xukunnadeeda lagu muransan yahay ama loo arko kuwo adag, waxay ka waxtar badan tahay nidaam rasmi ah oo gaabis ah oo aysan dadku si fudud u gaari karin. Sidaa darteed, maxkamadaha Al-Shabaab mararka qaarkood waxay qaabilaan dacwooyin ka yimaadda meelaha ka baxsan deegaannada ay maamusho.

## Garwaaqsiga Miisaanka Duqowda Iyo Culumada

Al-Shabaab waxay sidoo kale garwaaqsatay in Soomaaliya aan lagu maamuli karin awood militari oo keliya. Waxaa lagama maarmaan ah in lala shaqeeyo ama la hoos geeyo odayaasha dhaqanka, isimada, culimada iyo dadka deegaanka ku leh miisaanka bulshada.

Sidaas darteed, waxay samaysay goleyaal ay ku mideysan yihiin odayaal ka kala socda beelaha kala duwan oo loo yaqaan "Nuqabo", iyo sidoo kale goleyaal ay ku jiraan salaadiin iyo isimmo dhaqameed. Isla mar ahaantaana, waxay samaysay goleyaal culimo. Qaab-dhismeedyadani waxay ka tarjumayaan labada tiir ee qarniyada badan saldhigga u ahaa nidaamka bulsho ee Soomaalida, kuwaas oo kala ah dhaqanka iyo diinta.

Qaab-dhismeedyadani waxay kooxda ugu adeegaan dhowr ujeeddo; waxay ka caawiyaan la socodka cabashooyinka bulshada iyo xakamayntooda ka hor inta aysan isu beddelin khataro cusub, waxay maamulaan khilaafaadka beelaha si aysan u dhalan jihooyin dagaal oo cusub oo ka dhan ah kooxda, waxayna u adeegsadaan odayaasha iyo culimada inay sharciyad u yeeshaan maamulkooda. Sidoo kale, waxay maamulka deegaannada ka dhigaan mid u muuqda mid wadareed oo bulshada deegaanka salka ku haya, inkastoo awoodda dhabta ahi ay gacanta ugu jirto kooxda.

Farsamadan waxay leedahay dhinacyo nafsiyadeed iyo kuwo siyaasadeedba. deegaannada miyiga iyo meelaha fogfog, dadka deegaanka waxay qiimeeyaan cidda dhegeysata, xallisa murannada isla markaana ilaalisa kala dambaynta aasaasiga ah. Marka Al-Shabaab ay maamulkeeda ku darto oday ama caalim bulshada dhexdeeda sumcad ku leh, waxay yareynaysaa aragtida ah inay tahay awood shisheeye, waxayna isu soo bandhigtaa awood maxalli ah ama ugu yaraan "Soomaali" ah.

## Astaamaha Sirdoon ee Muujinaya Suurtagalnimada Nuuc Wadaxaajood oo ay Alshabaab Aqbali Karto

Marka laga eego dhinaca istiraatiijiyadda, xogaha sirdoonku waxay tilmaamayaan inuu jiro isbeddel ku wajahan ugu yaraan ka fiirsashada xal lagu dhammeeyo colaadda iyada oo loo marayo wadaxaajood, maadaama la qirsan yahay in labada dhinacba aysan awoodin guul militari oo buuxda. Dhinac kastaa wuxuu doonayaa inuu miiska wadaxaajoodka yimaado isagoo haysta Xujoxooggan. Mid ka mid ah xubnaha sare ee Al-Shabaab ayaa Machadka Saldhig u sheegay in kooxdu mabda' ahaan diyaar u tahay inay ka tanaasusho jihaadka caalamiga ah iyo xiriirka rasmiga ah ee ay la leedahay Al-Qaacida, balse aysan arrintaas si cad ugu dhawaaqi karin. Waxay doorbidayaan inay tanaasuladaas u adeegsadaan miiska wadaxaajoodka marka ay ogaadaan waxa ay ku heli karaan beddelkooda[27].

Si arrintan loo fahmo, waxaa muhiim ah in la fahmo nafsiyaadka dhaqdhaqaaqyada Islaamiga ah ee hubaysan. Kooxahani waxay si adag u ilaashadaan astaamaha, magacyada iyo qiimaha sumcadeed ee soo jiitay taageerayaashooda. Xitaa marka ay gudaha ka sameeyaan dib-u-habayn, marar dhif ah ayay si cad u muujiyaan tanaasul. Taa beddelkeeda, waxay doorbidaan inay isbeddelka si tartiib tartiib ah ugu muujiyaan dhaqankooda. Siyaasad ahaan, tan waxaa lagu soo koobi karaa mabda'a oranaya: "Astaantu ha sii jirto, xitaa haddii hab-dhaqanku isbeddelo."

## Gacan-ku-haynta Deegaannada iyo Weerarrada Joogtada ah: Midkee Mudnaanta U Leh Al-Shabaab?

Marka la isweydiiyo in Al-Shabaab ay doorbidayso xakamaynta dhulka mise weerarrada joogtada ah, jawaabta saxda ahi waa labadaba, iyadoo mudnaanta la siinayo hadba xaaladda taagan.

Al-Shabaab maanta uma dagaallamayso sida ciidan caadi ah oo doonaya inuu hal mar qabsado magaalo kasta oo uu calankiisa ka taago meel kasta. Sidoo kale kuma qanacsana hawlgallo aan lahayn saameyn dhuleed. Waxay doortay qaab dhexdhexaad ah oo ka fogaanaya ku fidsanaanta xad dhaafka ah ee dhulalka waaweyn ee nugul, iyadoo isla mar ahaantaana ilaalinaysa awoodda ay ku sii ahaan karto mid muuqata oo ay dib ugu soo laaban karto deegaannadii ay hore u maamuli jirtay. Taasi waa sababta marar badan loo arko iyadoo dib uga gurata cadaadis militari, balse maalmo, bilo ama sannad kadib mar kale dib ugu soo noqota marka ciidamada dowladda ay yaraadaan, daalaan ama ay isku dhacaan. Hiiraan, Galgaduud iyo Shabeellaha Dhexe ayaa marar badan lagu arkay qaabkan isdaba jooga ah ee gacan ku haynta isu beddelaysa.

Tani waxay muujinaysaa in xakamaynta dhulku aysan ahayn ujeeddo xeeladeed oo degdeg ah, balse ay tahay yool istiraatiijiyadeed, maadaama dhulku bixiyo canshuur, saad, gabbaad, dhaqdhaqaaq iyo nooc ka mid ah sharciyadda bulshada. Dhinaca kale, weerarrada joogtada ahi waxay sii hayaan joogitaanka nafsiyadeed iyo cadaadiska siyaasadeed. Sidaas darteed, kooxdu waxay si ula kac ah isugu darsataa maamul aan dhammaystirnayn iyo rabshad joogto ah.

27 Xubin sare oo ka tirsan oo Al-Shabaab, Janaayo 2026.

## Sidee Ayey Kooxdu Uga Falcelisaa Cadaadis Ciidan oo Xooggan?

Marka ay Al-Shabaab la kulanto cadaadis ciidan oo xooggan, waxaa si cad u muuqda qaabka ugu adkaysiga badan ee istiraatiijiyaddeeda: dib-u-gurasho aan loo arkin guuldarro, balse loo fahmo qayb ka mid ah qorshaha "dagaalka muddada dheer".

Marka guluf weyn lagu qaado, gaar ahaan marka ay is biirsadaan ciidamada dowladda, ciidamada deegaanka ama kuwa beelaha, iyo saaxiibada dibadda ee taageera dowladda, Al-Shabaab inta badan ma doorato in ay ku dhegto tuulo kasta iyadoo bixinaysa khasaare culus. Halkii ay sidaas yeeli lahayd, waxay u janjeertaa in ay dib u gurato si ay uga fogaato khasaare ballaaran oo laga baaqsan karay; waxay sugtaa in cadowgeedu ku fido dhulal ballaaran, saadka iyo isku xirkuna ku adkaado, daal iyo kala daadsanaanina soo baxaan. Kadibna waxay billowdaa olole weerar-celin ah oo ku dhisan weerarro joogto ah, carqaladaynta saadka, cabsi-gelinta dadka la shaqeeya dowladda, iyo si tartiib tartiib ah ugu soo noqoshada deegaannadii ay lumisay.

Tani waa mid ka mid ah sababaha ugu waaweyn ee colaadda u sii dheeraato. Guulaha ciidan ee bilowga ahi si sahlan uguma beddelmaan xasillooni waarta, sababtoo ah Al-Shabaab waxay dagaalka u aragtaa imtixaan adkaysi, ee uma aragto tartan gaaban oo leh khad dhammaad oo cad. Crisis Group[28] iyo Hay'adda Midowga Yurub ee Magangelyadu[29] waxay labaduba xuseen in guulihii ay dowladda gaartay 2023–2022 ay ahaayeen kuwo muhiim ah, balse adkaynta iyo sii haynta guulahaas ay noqotay caqabad, taasoo Al-Shabaab siisay fursad ay dib isu abaabusho, qaar ka mid ah deegaannadii ay lumisayna dib ugu soo noqoto.

Sheegasho kasta oo oranaysa in Al-Shabaab lagu jabin karo "maamul ka wanaagsan" waxay marka hore u baahan tahay in la qeexo cidda maamulkaas bixinaysa. Dowladda Federaalka Soomaaliya ma aha firaaq keliya; waxay leedahay awooddo dhab ah, inkastoo aanay si siman u shaqayn, waxayna leedahay tabar-darrooyin si fiican loo diiwaangeliyey. Sidaa darteed, maamulka Al-Shabaab waa in lagu akhriyaa iyadoo lala barbardhigayo awoodaha iyo tabar-darrooyinka dowladda.

Dhanka awoodaha, Dowladda Federaalka waxay gacanta ku haysaa magaalooyinka waaweyn; waxay leedahay aqoonsi caalami ah iyo taageero deeq-bixiyayaal; waxay leedahay ciidan qaran oo, marka lagu daro taageerada saaxiibada dibadda iyo xulafada beelaha, dib ula wareegay dhul muhiim ah; waxayna bixin kartaa waxyaabo Al-Shabaab qaab-dhismeed ahaan aysan bixin karin: ku xirnaanshaha dhaqaalaha rasmiga ah, ganacsiga dibadda, nidaamka bangiyada, waxbarasho caalami ahaan la aqoonsan yahay, iyo jid dawladnimo oo nidaamka caalamku aqbali karo. Is-waafajintii 2022 ee dowladda iyo ciidamada deegaanka waxay muujisay in marka dowladda lagu xiro bulshada deegaanka, ay si degdeg ah u rogi karto guulaha Al-Shabaab.

Dhanka tabar-darrada, caqabaduhu waa kuwo la yaqaan oo saameyn weyn leh: heshiis siyaasadeed oo aan weli si buuxda uga dhex bislaan dowladda dhexe iyo dowlad-goboleedyada; hay'ado amni oo siyaasadaysan, mararka qaarkoodna u dhaqma si dadka u muuqata mid dan gaar ah ama xadgudub leh; ku-tiirsanaanta ciidamada dibadda oo waajibaadkoodu aan mar walba caddeyn; musuqmaasuq luminaya kheyraad iyo sharciyad; iyo raasamaal siyaasadeed oo lagu bixiyo farsamaynta doorashooyinka halkii lagu bixin lahaa adeeg-bixin iyo xasilin.

28 Crisis Group (2023), Ilaalinta guulihii laga gaaray duullaanka Soomaaliya ee ka dhanka ahaa Al-Shabaab.
29 Hay'adda Midowga Yurub ee Magangelyada (2026), Warbixinta COI – Soomaaliya: Xaaladda Amniga.

Natiijadu waxay noqotaa in degmooyin badan awoodda dhaqaale iyo tan hay'adeed ee dowladda aysan isu beddelin maamul muuqda oo ay bulshadu dareento. Al-Shabaab waxay farqigaas uga faa'iidaysataa inay fududeyso ama sheegato dadaallo bulshada dhexdeeda ka socda, kadibna magaceeda ku lifaaqdo. Macnahan, Al-Shabaab waxay ku qanacsan tahay inay noqoto "sida biyo oo kale" — meel kasta oo dowladdu ka tagto ama ka gaabiso ayay ku qulquleysaa. Sidaas darteed, xooggeedu qayb ahaan waa cabbir muujinaya daloollada dowladda. Tartanku marar badan ma aha adeegyada Al-Shabaab iyo adeegyada dowladda oo si toos ah isu haya, balse waa sheegashada Al-Shabaab ee wax-qabad iyo maqnaanshaha muuqda ee dowladda.

Arrintani waxay horseedaysaa qiimeyn adag: Al-Shabaab waxay si ka dhakhso badan ula qabsataa duruufaha marka loo eego dowladda ay la dagaallamayso. Go'aan-qaadashadeedu waa ka dhexeeysan tahay, culaysyo yar ayaana saaran; danaha ay raacaysana waa ka cad yihiin. Waxaa kale oo aan hoos u dhigin shuruudaha deeq-bixiyeyaasha, wareegyada doorashooyinka, ama khilaafaadka u dhexeeya heerarka kala duwan ee dowladda. La-qabsigan degdegga ah — ee aan ahayn kheyraad ka badan kan dowladda — waa mid ka mid ah faa'iidooyinka ugu muhiimsan ee kooxda. Sidaa darteed, jawaab kasta oo dhab ah waa inay xirtaa farqiga kartida falcelinta iyo la-qabsiga, ma aha oo keliya farqiga kheyraadka.



# 7. Sidee Ayuu Isku Beddelay Xiriirka Ka Dhexeeya Al-Shabaab iyo Bulshooyinka Deegaanka?

Marka lagu saleeyo xogta la hayo, dadka ugu badan ee ku nool deegaannada ay Al-Shabaab maamusho waxay ka soo jeedaan miyiga ama magaalooyinka yaryar. Xiriirka ka dhexeeya maamulka Al-Shabaab iyo bulshooyinkan wuxuu ku dhisan yahay laba tiir oo waaweyn: xuduudo si cad loo qeexay iyo baahiyo is-dhaafsi ah.

Gudaha "wilaayaadka" ay kooxdu u kala qaybiso deegaannada ay maamusho, awoodda dhabta ahi waxay ka timaaddaa Al-Shabaab; bulshada deegaanka wax door ah oo muuqda kuma laha qaabaynta heerarka sare ee maamulka. Hase yeeshee, heerarka hoose ee maamulka iyo amniga, waxaa shaqooyinka qaarkood loo dhiibaa dadka deegaanka, sida xubnaha Xisbada oo u shaqeeya qaab boolis, gaar ahaan deegaannada fogfog ama tuulooyinka yaryar ee miyiga, iyo sidoo kale hawlwadeennada kale ee heerka hoose ee bulshada dhexdeeda ka shaqeeya[30].

Tani waxay abuurtaa nidaam isku dhaf ah: awoodda sare waxay ka timaaddaa ururka, halka fulinta hoose ay ka dhex muuqdaan wejiyo ay bulshada taqaan. Taasi waxay ka hortagtaa in maamulka ururku gebi ahaanba ka go'doomo deegaanka uu ka shaqaynayo, waxayna u saamaxdaa inuu si xakameysan ugu dhex milmo bulshada. Marka laga eego dhinaca nafsiyadeed, bulshada waxaa u fudud inay la qabsato maamul ay shaqaalihiisa hoose yihiin deris ama qaraabo, dad ay ka oran karaan "hebel waa qof deegaanka ah ama naga mid ah."[31]

Dadka ku nool deegaannadan waxay leeyihiin baahiyo aasaasi ah oo muuqda: amni, caddaalad, xallinta khilaafaadka beelaha, waxbarasho, caafimaad, biyo iyo adeegyo kale, ha ahaadeen kuwo lacag lagu bixiyo ama bilaash ah. Baahiyahan badankood ugu yaraan qayb ahaan waa la daboolaa, ama dadka waxaa la dareensiiyaa in wax laga qabanayo. Dhinaca kale, Al-Shabaab waxay bulshada uga baahan tahay tiirarka caadiga ah ee awood kasta oo maxalli ah ku tiirsan tahay: u hoggaansamidda amarradeeda, bixinta canshuuraha, helidda dagaalyahanno cusub iyo la jaanqaadidda fikirkeeda. Sidaa darteed, xiriirkani ma aha mid hal jiho u socda, balse waa is-dhaafsi baahiyo oo labada dhinacba wax ka doonayaan[32].

Qodob muhiim ah oo sii xoojiya qaabkan waa doorka odayaasha dhaqanka, culimada diinta iyo ganacsatada. Saddexdan qaybood waa xarigga isku xira ururka iyo bulshada: waxay gudbiyaan farriimaha, wax ka qabtaan cabashooyinka, dhexdhexaadiyaan marka khilaaf dhasho, waxayna qaabeeyaan jidka ay Al-Shabaab ku adeegsato awooddeeda. Marka la falanqeeyo, tani aad bay muhiim ugu tahay bulsho wali si xooggan ugu dhisan hab-beeleed iyo diin; cidda maamusha odayaasha iyo culimada waxay si dadban u maamushaa hadalka bulshada, xasilloonida bulshada iyo heerka aqbalaadda ama diidmada maamulka.

Marka la barbar dhigo marxaladihii hore, xogtu waxay muujinaysaa horumar cad. Bilowgii, xiriirku wuxuu inta badan ku dhisnaa cabsigelin, iyadoo dadka deegaanka ay ka fogaayeen kooxda. Xubno badan oo Al-Shabaab ka tirsanaa waxay ahaayeen dad ka yimid gobollo kale, taas oo sii xoojisay kala fogaanshaha bulshada, isla markaana adkaysay in cabashooyinka si fudud loo gudbiyo. Hase yeeshee, muddo ka dib waxaa dhacay hab is-dhexgal bulsho ah: dadka deegaanka waxaa lagu daray xilal heer hoose ah, waxaa la siiyey xorriyad go'aan, mararka qaarkoodna waxaa loo dallacsiiyay xilal heer dhexe ah[33].

30 Oday dhaqameed, Mubaarak, Shabeellaha Hoose, Febraayo 2026.
31 Isla tixraacaas
32 Isla tixraacaas
33 Isla tixraacaas

Arrintan waxaa la socday hab ka dabacsan kii hore, inkastoo si taxaddar leh loo xakameeyo. Marka kooxda ay dareento cabsi ama caro bulshada dhexdeeda ka jirta, waxay qabataa kulamo, wada-hadallo ayay samaysaa, waxayna soo bandhigtaa muuqaal ah inay "dadka u adeegayso." Dadka deegaanka waxaa la weydiiyaa cabashooyinkooda, qaar ka mid ahna waa laga jawaabaa. Tani waxay yareysay kala fogaanshihii u dhexeeyay bulshada iyo maamulka, ilaa heer maanta bulshooyinka qaarkood ay awoodaan inay cabasho ka gudbiyaan mas'uuliyiin gaar ah, halka odayaashuna ay yeeshaan saameyn muuqata. Xitaa haddii cabashooyinka waaweyn ay waqti qaataan in la xalliyo, dareenka ah "waa nala maqlayaa" wuxuu leeyahay miisaan nafsiyadeed oo weyn.

Warbaahinta, waxbarashada iyo tababarrada ay bixiso Al-Shabaab ayaa sidoo kale gacan ka geysta yareynta farqiga u dhexeeya kooxda iyo bulshada. Sida ay muujinayaan markhaatiyada deegaanka, meelaha ay Al-Shabaab maamusho aad bay u yar tahay ama way adag tahay in la helo qof aan mar uun ka qaybgelin duruus ama koorsooyin ay kooxdu bixisay, ha ahaado dukaanle, xoolo-dhaqato, haween ganacsi yar yar sameeya, xamaali, darawal ama shaqaale kale. Diidmada ka qaybgalka duruustaas mararka qaarkood waxay keeni kartaa ciqaab. Tani waxay muujinaysaa in saameynta kooxda aysan ku koobnayn qasab hubaysan, balse ay sidoo kale ku lug leedahay dib-u-qaabaynta joogtada ah ee fikirka bulshada iyo hab-dhaqanka nolol maalmeedka[34].

Heerka fikradeed, dadka waxaa la baraa in mashruuca Al-Shabaab uu matalo "diinta", halka dowladda lagu sawiro mid aan Islaam ahayn. Qaabkan waxaa sii xoojiya waayo-aragnimada nolosha, go'doonka warbaahineed iyo dhacdooyin sida duqeymaha cirka ee Mareykanka, kuwaas oo loo fasirto si taageeraysa sheekada kooxda: in "Mareykanku na duqeynayo sababteedu waa waxaan hirgelinaynaa shareecada," iyo in "ciidamada Midowga Afrika ay halkan u joogaan inay la dagaallamaan dhaqankeenna iyo diinteena."

Guud ahaan, xiriirka ka dhexeeya Al-Shabaab iyo bulshooyinka deegaanka wuxuu ka soo guuray xiriir si buuxda ugu dhisnaa cabsigelin, wuxuuna isu beddelay isku dhaf ka adag oo ka kooban cabsigelin, la qabsi, kalsooni xaddidan iyo is-dhexgal bulsho[35].



34 Ganacsade, Bu'aale, Febraayo 2026.
35 Oday dhaqameed, Ceel-Cadde, Maarso 2026.

# 8. Sidee Ayuu Isku Beddelay Habka Qorista Xubnaha Cusub?

Xogta la hayo waxay muujinaysaa in isdhexgalka sii kordhaya ee u dhexeeya Al-Shabaab iyo bulshooyinka deegaanka uu ka dhigay qorista xubnaha cusub mid aad uga sahlan sidii hore. Marka dadku maalin kasta la falgalaan fikradaha kooxda iyada oo u mareysa warbaahinteeda, hawlaheeda waxbarasho, xiriirrada qoyska ama xiriirrada shaqada, la falgalkaas joogtada ahi wuxuu si tartiib tartiib ah u abuuraa jawi ay ururku uga muuqato qayb ka mid ah nolol maalmeedka, halkii loo arki jirey wax gebi ahaanba ka baxsan bulshada.

Natiijada ka dhalatay arrintan ayaa ah in qorista xubnaha cusub aysan mar dambe ku tiirsanayn ololeyaal gaar ah ama abaabulo muuqda. Waxay isu beddeshay hannaan ku dhowaad caadi ka noqday nolosha bulshada dhexdeeda. Dhalinyarada ku barbaarta deegaannada ay ka taliyaan fikradaha iyo hadallada kooxda, kuwaas oo ka dhex muuqda masaajidda, warbaahinta maxalliga ah, wada sheekaysiga qoysaska iyo koorsooyinka khasabka ah, waxay ku noolyihiin jawi ay aad u adagtahay in si cad loo kala saaro “bulshada caadiga ah” iyo “ururka”. Xaaladdan, ku biirista kooxda uma muuqato tallaabo xagjirnimo ah, balse waxay u ekaan kartaa waddo dabiici ah ama xitaa mid la filayo. Qaab-dhismeedka bulshada iyo duruufaha jira ayaa horey u fududeeyey jidkaas.

Waxaa jira qodob muhiim ah oo aysan ku baraarugsanayn daneeyayaasha caalamiga ah: Alshabaab xubno cusub kama qoroto deegaanada ay dowladdu ka arrimiso. Taas beddelkeed, kooxdu waxa ay xubnaha cusub ka dhex qorataa bulshooyinka ay iyagu maamulaan amaba si uun ay saamayn ugu leeyihiin, taa oo ka dhigan in kooxdu ay awooddeeda isugu geynayso dhinacyada horay u taageersanaa, beddelka ku tiirsanaanta dhanka dowladda. Tani waxa ay ka dhigantahay, in ay isa sii tarayso awoodda qorashada xubnaha cusub ee kooxda, iyadoo lala eegaayo deegaanada baaxadda leh ee a gacanta ku hayaan. Sidaa darteed, in la wiiqo saamaynta ay bulshada ku yeelan karaan, lagana hortagayo farriimahooda, taas oo xaddidi kartaa awoodooda ciidan qorasho.

Labo arrin oo dhaqan-dhaqaale ayaa shidaalinaya arrinkaan: faqriga xargaha goostay, ee ay abaaruhu na ay sii kordhinayaan iyo shaqo la’aanta. Marka dhalinyaro badan ay la kulmaan duruufo adag isla markaana ay arkaan fursado yar oo ay ku heli karaan nolol ka yara wanaagsan tan ay markaa ku nool yihiin, soo jeedin kasta oo siinaysa dareen macne leh, waajib, sharaf iyo door ay bulshada ku leeyihiin waxay noqotaa mid soo jiidasho badan. Haddii arrintan lagu lammaaniyo dood diini ah oo ku salaysan waajib iyo ajar, waxaa abuurma laba dhiirrigelin oo xooggan: mid nafsiyadeed oo la xiriirta aqoonsiga, himilada iyo maqaamka qofka, iyo mid maaddi ah oo siinaysa waddo uu uga baxo quusta iyo rajo la’aanta. Qofka la qorayo waxaa loo sheegaa inuusan ahayn oo keliya shaqaale ama dagaalyahan, balse uu gudanayo “waajib diini ah” isla markaana uu haysto mansab sharaf leh. Dhalinyarada raadinaysa aqoonsi iyo muhiimad gaar ah, farriintani waxay leedahay soo jiidasho weyn.

Marka la barbar dhigo xilliyadii hore, oo qoristu inta badan ku dhisnayd qasab iyo cabsi-gelin muuqata, habka maanta jira wuxuu si weyn ugu tiirsan yahay qancinta fikirka oo si tartiib tartiib ah u dhacda iyo duruufaha nololeed ee jira[36]. Ujeeddadu waa in qofka tallaabo tallaabo loogu horseedo inuu ku biirista ururka u arko arrin caadi ah ama fursadda ugu wanaagsan ee uu heli karo.

36 Tan iyo markii Taliban ay dib ugu soo noqotay xukunka Afgaanistaan, Al-Shabaab waxay dhacdadaas sii kordhisay in ay u adeegsato tusaale ku jira sheekadeeda (narrative), iyada oo u sawiraysa xaalad laga yaabo in Soomaaliya ay geli karto mustaqbalka dhow. Sida farriimaha kooxda ku cad, dadka doonaya in ay danahooda mustaqbalka ilaashadaan waxa ay ku dhiirrigeliyaan in ay taageeraan dadaallada lagu ridayo Dowladda Federaalka.

## Isku-dhafka Qasab, Bixinta Adeegyada, iyo Barbaarinta Fikradeed

Saamaynta Al-Shabaab kuma dhisna hal aalad oo keliya, balse waxay ku salaysan tahay isku dhaf ka kooban cabsi, dacaayad, adeegyo bulsho iyo nidaam urureed oo adag. Tani waa sababta daraasaddani uga fogaanayso sharraxaadaha fudud ee sheegaya in "kooxdu ay wax ku maamusho cabsigelin oo keliya" ama in wax walba ay ku salaysan yihiin "warar marin habaabin ah", iyadoo taa beddelkeeda diiradda saaraysa sababaha qotada dheer ee ka dambeeya sii jiritaanka iyo isbeddelka kooxda.

Caddeymaha uu heley Machadka Saldhig waxay muujinayaan in Al-Shabaab ay u shaqayso qaab ay dad badan oo deegaanka ahi u arkaan mid "u eg dowlad". Dhinacyada militari iyo kuwa rayidkaba, waxay inta badan isku daydaa inay gaarto heer sare oo fulineed. Guuldarrooyinka hawlgallada waxay inta badan ka dhashaan tabar-darro xagga xirfadaha ah ee kama imaadaan rabitaan la'aan ama daacadnimo yari dhanka hawlgalka ah[37]. Marka dhinaca falanqaynta laga eego, arrintani waa muhiim, sababtoo ah waxay sharraxaysaa sababta dadka qaarkood ay kooxda ugu arkaan awood leh isku xirnaan gudaha ah iyo xeerar la saadaalin karo, marka loo eego hay'ado dowladeed oo daciif ah ama kala daadsan.

Dhanka u hoggaansanaanta, waxaa jira nidaam adag oo isla xisaabtan iyo cabsi ku dhisan, kaas oo saameeya shacabka caadiga ah iyo xitaa xubnaha Al-Shabaab laftooda. Dhaqanka dadka waxaa hagaya caqiidada iyo damiirka, balse marka arrimahaas lagu xoojiyo cabsida ciqaabta ururka, waxay isu beddelaan xannibaado aad u awood badan. Dadku waxay isku arkaan laba awoodood oo is barbar socda; dhinac waxaa ka jira waxa ay rumaysan yihiin, dhinaca kalena waxaa ka jira cabsida ka dhalan karta ciqaab. Tani waa mid ka mid ah hababka ugu awoodda badan ee lagu xakameeyo bulshada, maadaama ay yarayso fursadda uu qofku si xor ah ugu dooran karo mowqifkiisa[38].

Dhanka fikirka, duruusta joogtada ah, wax-soo-saarka warbaahineed iyo kulamada joogtada ahi waxay abuuraan hannaan muddo dheer soconaya oo qaabeeya aragtida dadka. Qofka maalin kasta maqla sheeko isku mid ah, arka muuqaallo isku mid ah, isla markaana aan heli karin ilo kale oo ka duwan, wuxuu si weyn ugu dhowaanayaa inuu sheekadaas u aqbalo xaqiiqo jirta. Arrintani waxay waafaqsan tahay mabda' nafsiyadeed oo caan ah, kaas oo sheegaya in "markii aragti si joogto ah loogu celceliyo oo aysan la kulmin iska caabin dhab ah ay si tartiib tartiib ah isu beddesho wax la rumaysto ama ugu yaraan loo aqbalo inay tahay run."[39]

Bixinta adeegyada sida amniga, caddaaladda, biyaha, waxbarashada iyo caafimaadka ayaa iyaguna ku dara lakab kale oo xasillooni abuura. Qofka ku tiirsan cid bixisa adeegyada lagama maarmaanka u ah noloshiisa maalinlaha ah wuxuu ugu yaraan dareemayaa baahi iyo ku tiirsanaan uu u qabo ciddaas, xitaa haddii aysan jirin jacayl dhab ah ama oggolaansho buuxa. Sidaa darteed, saameyntu waxay ka dhalataa isku darka daboolidda baahiyaha, beerista cabsida iyo xoojinta joogtada ah ee fikradaha[40].

Marka la soo koobo, xogta la helay waxay muujinaysaa in xiriirka ka dhexeeya Al-Shabaab iyo bulshada ku nool deegaannada ay maamusho uu maray isbeddel weyn. Wuxuu ka soo gudbay marxalad ku dhisnayd cabsi ku dhowaad keli ah, wuxuuna u gudbay marxalad lagu garto isdhexgal bulsho, bixinta adeegyada, ka qaybgalka habaysan ee odayaasha iyo culimada, barbaarin fikir oo joogto ah iyo nidaam maamul oo dad badani u arkaan mid shaqaynaya. Maanta, qorista xubnaha cusub waxay ka faa'iidaysataa jawigan, gaar ahaan meelaha ay ka jiraan shaqo la'aan, abaaro iyo bulsho ay dhalinyaradu u badan yihiin, si xubnaha cusub loogu soo jiido ururka iyada oo ku biiristu u muuqanayso waddo nololeed oo dabiici ah ama xitaa la jeclaysan karo.

37 Xubin ka tirsan Xafiiska Wilaayada ee Al-Shabaab, Jilib, Abriil 2026.
38 Xubin ka tirsan Amniyaadka Al-Shabaab, Febraayo 2026.
39 Ganacsade, Saakow, Janaayo 2026.
40 Isla tixraacaas

# 9. Sidee Loo Saadaalin Karaa Mustaqbalka Istiraatiijiyadda iyo Xeeladaha Al-Shabaab?

Al-Shabaab waxay dhinac kasta si qoto dheer ugu tiirsan tahay bulshada Soomaaliyeed, arrin si weyn uu u qaabeeyey Fazul Abdullah, oo ahaa sarkaal sare oo Al-Qaacida u qaabilsanaa Bariga Afrika, kaas oo ku qanciyey Al-Shabaab in dhisidda xiriirro qoto dheer oo lala yeesho bulshada ay tahay arrin muhiim u ah sii jiritaanka kooxda. Inkastoo Al-Shabaab ay urursatay kayd dhaqaale oo aad u weyn intii u dhaxaysay 2009 iyo 2022, haddana waxay weli saameyn ku yeelataa wax kasta oo saameeya Soomaalida caadiga ah, ha noqoto dhinaca dhaqaalaha, militariga ama guud ahaan nolosha iyo hab-nololeedka maalinlaha ah. Guud ahaan, hab-nololeedka Soomaalidu wuxuu si weyn ugu tiirsan yahay badeecadaha dibadda laga keeno iyo lacagaha ay soo diraan qurba-joogtu, kuwaas oo taageera qayb weyn oo ka mid ah qoysaska Soomaaliyeed.

Arrintani waxay Soomaaliya, iyo si dadban Al-Shabaab-ba, uga dhigaysaa kuwo si weyn ugu nugul qalalaasaha caalamiga ah. Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya waa xarunta dhaqaalaha iyo isha ugu weyn ee wax-soo-saarka cuntada ee dalka, taas oo awood u leh inay muddo dheer dammaanad qaaddo amniga cunnada. Hase yeeshee, loollanka awoodda ee u dhexeeya dowladda iyo Al-Shabaab ayaa gobolladaas u beddelay goobo dagaal, taas oo Soomaaliya ku khasabtay inay ku tiirsanaato wax-soo-saarka dibadda, mana aha doorasho, ee waa arrin ay duruufi qasabtay.

Waxaa jira laba khalad oo caadi ah oo la galo marka laga fikirayo mustaqbalka. Midka koowaad waa cabsi xad-dhaaf ah oo sawiraysa burbur degdeg ah, halka kan labaad uu yahay isku halayn aan sal lahayn oo ku adkaysanaysa in wax weyn aysan isbeddeli doonin, taas oo macnaheedu yahay in xaaladda jirta ay sidii hore ku sii socon doonto. Xaqiiqadu badanaa waxay taallaa meel u dhaxaysa labadaas. Sidaa darteed, saadaasha ugu macquulsan ee shanta sano ee soo socota ma aha burbur buuxa iyo sidoo kale ma aha xasillooni dhamaystiran, balse waa sii socoshada qalalaase iyo xasillooni darro aan sugneyn.

Sida dhawaan lagu arkay saamayntii ka dhalatay colaaddii u dhexeysay Mareykanka, Israa'iil iyo Iiraan, Soomaaliya waxay la kulantay saameyn dibadda uga timid oo halis gelisay dadaallada soo kabashada muddada dheer[41]. Maaddaama dalku si weyn ugu tiirsan yahay badeecadaha dibadda laga keeno, awooddiisa uu ku xamili karo khalkhalka ka dhasha colaadaha noocan oo kale ah waa mid xaddidan. Tani waxay qusaysaa cunnada, daawooyinka, qalabka elektarooniga ah iyo shidaalka. Sida ay sheegtay Hay'adda Cuntada iyo Beeraha ee Qaramada Midoobay (FAO), tan iyo sannadkii 2005 in ka badan boqolkiiba toddobaatan cuntada Soomaaliya laga isticmaalo waxay ka timid waxyaabaha dibadda laga keeno ama gargaarka caalamiga ah[42], halka adeegyada xawaaladaha iyo lacagaha qurba-joogtu ay sannadkii 2025 ka ahaayeen qiyaastii boqolkiiba shan iyo labaatan wax-soo-saarka guud ee dalka[43]. Xogta Soomaaliya waxay sidoo kale muujinaysaa kororka lacagaha dibadda laga soo diro iyo ganacsiga caalamiga ah sannadkii 2024.

Dalka ugu nugul ma aha had iyo jeer kan ugu saboolsan, balse waa kan si weyn ugu tiirsan kaalmo dibadeed isla markaana aan lahayn keyd gudaha ah oo ku filan. Soomaaliya waxay leedahay kayd yar oo cunto iyo daawo ah, wax-soo-saar gudaha oo daciif ah, ilo wax soo dejin oo aan kala duwanayn iyo nidaam xawaaladeed oo si fudud ugu nugul xeerarka iyo isbeddellada dibadda. Waxaa intaas dheer maalgelin la'aanta dhinacyada biyaha iyo beeraha iyo maqnaanshaha istiraatiijiyad qaran oo si dhammaystiran u mideysa amniga, ganacsiga, isbeddelka cimilada iyo siyaasadda caalamiga ah. Xaaladdani waxay kordhinaysaa baaxadda saameynta dhibaatooyinka maanta jira iyo kuwa iman kara mustaqbalka.

41 ISS (2026), Sida dagaalka Iiraan u wiiqi karo soo-kabashada nugul ee Soomaaliya.
42 FAO (2022), Qaab-dhismeedka Nidaamyada Cuntada – Soomaaliya.
43 Dowladda Federaalka Soomaaliya (2025), Warbixinta Jawiga Maalgashiga 2025 ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

## Sidee Ayey Xaaladahani U Saamayn Karaan Al-Shabaab?

Marka xaaladdan guud lagu eego xogaha la isku hallayn karo ee tilmaamaya in Al-Shabaab ay hadda marayso ama ku dhowdahay heerkii ugu sarreeyey ee dhinacyada tirada dagaalyahannada, hubka, waayo-aragnimada iyo bisaylka urureed, waxay u badan tahay inay noqoto mid ka mid ah dhinacyada ugu yar ee si degdeg ah u saameyn doona qalalaasaha ka dhasha nidaamka guud, inkastoo marar badan si rasmi ah loo sheego in kooxdu sii daciifayso[44]. Sanadihii la soo dhaafay, luminta dhulal ballaaran iyo magaalooyin waaweyn, iyo sidoo kale dilka tiro badan oo hoggaamiyeyaal ka tirsan Al-Shabaab ah, ayaa keentay in mas'uuliyiin dowladeed iyo falanqeeyayaal amni ay saadaaliyaan in kooxdu aysan dib u soo kaban doonin. Hase yeeshee, haddii ka saarista magaalooyinka ay ku filnaan lahayd burburinta kooxda, waxay gebi ahaanba burburi lahayd sannadihii 2011 iyo 2012, markaas oo laga saaray Muqdisho iyo inta badan gobolladii muhiimka ahaa. Sii jiritaankeeda iyo soo laabashadeedii dambe waxay muujinayaan in adkaysigeedu ku salaysan yahay tiirar istiraatiijiyadeed oo qoto dheer, kuwaas oo u baahan faham ka xeel dheer kan dusha sare.

Arrintani waxay dhalinaysaa su'aal muhiim ah: maxaa u suurta geliyey Al-Shabaab inay u adkaysato ku dhowaad labaatan sano oo dagaal ah, maxaase ugu badan inuu sii xoojin doono jiritaankeeda mustaqbalka?

01

1. Al-Shabaab waxay si ula kac ah u dheereysaa dagaalka. Waxay ka fogaataa tallaabo kasta oo horseedi karta in colaadda si degdeg ah oo kama dambays ah loo soo afjaro, sida inay hal mar ku wajahdo awood ciidan oo ka xoog badan. Taa beddelkeeda, waxay doorbidaa inay waqtiga ku beddesho dhulka, iyada oo mudnaanta siinaysa sii jiritaankeeda.

02

2. Hoggaanka kooxda wuxuu mudnaanta siinayaa ilaalinta saameynta iyo jiritaanka ururka halkii uu ka siin lahaa astaamaha guusha. Ma aha kuwo si gaar ah ugu dheggan haysashada magaalo ama deegaan haddii difaaciisu keenayo khasaare aan la qaadi karin. Waxay diiradda saaraan sidii ay ugu adkayn lahaayeen cidda cusub ee la wareegta deegaanka inay si buuxda u xasiliso ama ugu dareento ammaan.

03

3. Kooxdu waxay si joogto ah u maalgelisaa horumarinta nafteeda. Waxay ku dadaashaa koboca dhinacyada kala duwan, oo ay ku jiraan soo saarista hubka, maamulka iyo diyaarinta ciidamo tababaran. Dad xog ogaal ah ayaa tilmaamaya in Al-Shabaab ay ku sii dhawaanayso isku filnaansho dhinacyo badan ah, isla markaana ay sii yaraanayso baahideeda ku aaddan taageerada dibadda.

04

4. Al-Shabaab waxay isu diyaarisaa labada xaaladoodba; wadaxaajood siyaasadeed iyo sii wadista dagaalka hubaysan. Waxay isku daydaa inay mar kasta diyaar u ahaato waddada u muuqata inay siinayso fursadda ugu wanaagsan, ha noqoto miiska wadaxaajoodka ama adeegsiga awoodda.

44 Xubin ka tirsan Golaha Shuurada ee Al-Shabaab, Abriil 2026.

05

5. Al-Shabaab waxay ka faa'iidaysataa kayd dhaqaale oo aad u weyn. Sida ay muujinayaan xogaha aan helney, kooxdu waxay haysataa kayd maaliyadeed oo ku filan inay sannado badan ku sii maalgeliso hawlaheeda. Qiyaasaha jira waxay tilmaamayaan in kaydkeeda dhaqaale uu u dhexeeyo sagaashan ilaa boqol iyo labaatan milyan oo doolar[45]. Kaydkan dhaqaale ayaa laf-dhabar u ah istiraatiijiyaddeeda ku dhisan "dagaalka muddada dheer", maadaama uu suurtageliyo qorista xubnaha cusub, bixinta saadka iyo sii wadista maamulka xitaa marka ay la kulanto cadaadisyo culus.



45 Hanti-dhowre sare oo ka tirsan maaliyadda Al-Shabaab, Jilib, Abriil 2026.

# 10. Haddaba, Maxaa Laga Filan Karaa Al-Shabaab Sannadaha Soo Socda?

Waxaa jira dhowr jihadood oo u badan inay qaabeeyaan mustaqbalka Al-Shabaab muddada dhow iyo tan dhexe. Waqtigan xaadirka ah, Al-Shabaab waxay xoogga saaraysaa dhismaha awood militari oo ka xirfad badan tii hore, leh qaab-dhismeed hoggaamineed oo adag iyo awood dagaal oo si joogto ah u sii kordhaysa. Weerar-celisyadii ay ka fulisay gobollada Galgaduud, Hiiraan iyo Shabeellaha Dhexe waxay muujiyeen in kooxdu leedahay ciidamo awood u leh inay u adkaystaan cadaadis isku mar uga imanaya ciidamada dowladda federaalka, maleeshiyaadka beelaha iyo duqeymaha circa ee xooggeystey. Isla mar ahaantaana, kooxdu waxay maalgelin dheeraad ah ku samaysay horumarinta awooddeeda dhinaca samaynta hubka iyo sameynta walxaha qarxa ee la farsameeyo.

Mudnaanta kale ee laga filan karo ayaa ah xoojinta xiriirrada dibadda si loo ballaariyo fursadaha taageero iyo wadaxaajood. Xoojinta xiriirka ay la leedahay dhinacyada dibadda, gaar ahaan Xuutiyiinta oo ay ka heli karto qalab militari, iyo sidoo kale dowlado ama quwad siyaasadeed oo danaynaya dhexdhexaadinta wadaxaajoodyada, waxay u badan tahay inay noqdaan meelaha ay diiradda saari doonto. Sidoo kale, kobcinta xiriirrada ay la samaysato dalal dheeraad ah, iyadoo Iiraan safka hore kaga jirto, waxay sii kordhin kartaa awooddeeda militari iyo saamaynteeda siyaasadeed.

Al-Shabaab waxay sidoo kale ku hawlan tahay inay isu muujiso nidaam u eg dowlad oo awood u leh inuu la falgalo dunida inteeda kale. Maqnaanshaha heshiis siyaasadeed oo qaran, oo ka muuqda is-mari-waaga joogtada ah ee u dhexeeya dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, iyo sidoo kale hab-maamulka liita ee ka jira hay'adaha dowladda, waxay kooxda siinayaan fursad ay isku soo bandhigto inay tahay nidaam beddel u noqon kara kan jira.

Sida hore loo xusay, Al-Shabaab waxay waddaa dib-u-habayn maamul waxayna isku dayaysaa inay hagaajiso sumcadeeda iyo xiriirka ay la leedahay bulshooyinka deegaanka. Muddo dheer waxay isu soo bandhigaysay dhaqdhaqaaq qaran oo "xorayn" ah. Sheekadan ay gudbinayso waxay sii heli kartaa taageero dheeraad ah iyadoo laga faa'iidaysanaysa arrimo ay ka mid yihiin dadaallada Itoobiya ay ku doonayso marin ay ku gaadho xeebaha Soomaaliya iyo aqoonsiga Israa'iil ee Somaliland, kuwaas oo Al-Shabaab u adeegsan karto inay ku muujiso in madaxbannaanida Soomaaliya ay halis ku jirto, isla markaana ay ku dooddo in awood Islaami ah oo madax-bannaan oo xooggan oo keliya ay awood u leedahay inay difaacdo. Iyadoo arrimahan xoogga saaraysa, Al-Shabaab waxay gudaha dalka ka abuuri kartaa taageero dheeraad ah, halka dhinaca dibaddana ay isku soo bandhigi karto inay tahay awood habaysan oo u eg dowlad, isla markaana awood u leh inay wadaxaajood la gasho quwadaha gobolka iyo kuwa caalamiga ah.

Haddii aysan dhicin isbeddel weyn oo ku yimaadda awoodda dowladda Soomaaliyeed ama jawiga gobolka, saadaasha ugu macquulsan waxay tahay in Al-Shabaab ay sii ahaan doonto awood dhexe oo leh karti sare oo la qabsata xaaladaha isbeddelaya. Waxay u badan tahay inay sii waddo istiraatiijiyadda ku dhisan dagaalka muddada dheer, inay sii horumariso awooddeeda militari iyo nidaamyadeeda maamul, inay ka faa'iidaysato xulafooyinka dibadda, isla markaana ay ilaaliso astaamaheeda fikradeed ee aasaasiga ah iyadoo isla waqtigaas muujinaysa dabacsanaan weyn oo dhinaca dhaqanka iyo danaha ku salaysan.

# 11. Sidee Ayuu U Qaabaysan Yahay Xiriirka Ka Dhexeeya Al-Shabaab, Al-Qaacida iyo Xuutiyiinta?

Al-Shabaab muddo dheer waxay ahayd mid ka mid ah laamaha ugu muhiimsan ee Al-Qaacida ku leedahay Bariga Afrika, iyadoo xiriirkoodu ku salaysnaa mabda' diimeed iyo taageero istiraatiijiyadeed. Hase yeeshee, sannadihii u dambeeyay waxaa muuqday isbeddel tartiib tartiib ah; xiriirka ay la leedahay Al-Qaacida ayaa si muuqata u gaabiyey, halka ay soo ifbaxday iskaashi cusub oo ku dhisan danaha iyo waaqaca siyaasadeed, kaas oo ay la samaysatay dhinacyo ka baxsan deegaanka fikirka iyo aydaloojiyadda ee ay markii hore ku dhex jirtay, kaasoo si gaar ah looga xusi karo Xuutiyiinta Yemen.

Warbixintii Machadka Saldhig ee Febraayo 2026 waxay tilmaamtey in xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta uu isu beddelay iskaashi istiraatiijiyadeed oo sii xoogaysanaya. Tani waxay ka dhigan tahay isbeddel muhiim ah oo ku yimid hab-fikirka kooxda, gaar ahaan sida ay u dheellitirayso mabaadi'deeda diineed iyo danaha ka baxsan fikirka keliya. Xiriirka ka dhexeeya Al-Shabaab, Al-Qaacida iyo Xuutiyiinta waa mid adag, balse salka ku haya danaha iyo waaqiciga jira. Inkasta oo aanu jirin heshiis rasmi ah oo u dhexeeya Al-Qaacida Jaziiradda Carabta (AQAP) iyo Xuutiyiinta, islamarkaana ay hakad ku yimaadeen dagaalladii tooska ahaa ee dhexdooda ka socday, haddana labada dhinac waxay weli isu arkaan cadow. Hoos u dhaca Al-Qaacidada Yemen iyo xaaladda Xuutiyiinta oo ay saameeyeen cunaqabatayn xaddidaysa marin-u-helkooda suuqyada iyo xiriirkooda gobolka, ayaa Al-Shabaab siisay fursad iyo marin ay ku samayso isu dheellitirnaan iyo isdhaafsi istiraatiijiyadeed oo cusub gudaha gobolka.

## Xiriirka Taariikhiga ah ee Ka Dhexeeya Al-Shabaab iyo Al-Qaacida

Xiriirka Al-Shabaab iyo Al-Qaacida waxaa si rasmi ah loo shaaciyey sannadkii 2012 xilligii uu hoggaaminayey Axmed Cabdi Godane[47]. Go'aankaas wuxuu ahaa mid istiraatiiji ah, wuxuuna kooxda u horseeday ugu yaraan saddex faa'iido oo waaweyn. Tan koowaad, wuxuu siiyey sharciyad iyo aqoonsi jihaadi ah oo caalami ah oo ku hoos jira magaca Al-Qaacida, taas oo ka caawisay Al-Shabaab inay ka gudubto muuqaalkeedii hore ee koox kacdoon maxalli ah una gudubto urur si rasmi ah uga dhex muuqda jihaadka caalamiga ah. Tan labaad, waxay heshay tababar, khibrad iyo aqoon militari oo la xiriirta dhinacyo ay ka mid yihiin walxaha qarxa, ammaanka hawlgallada, soo saarista warbaahinta iyo qorshaynta hawlgallada dibadda. Tan saddexaad, waxay ku biirtay mashruuca ballaaran ee "jihaadka caalamiga ah", kaas oo siiyey qaab fikir iyo sheeko aydiyoolajiyadeed oo awood u leh inay soo jiidato dagaalyahanno ajaanib ah iyo ilo maalgelin oo dibadda ah, isla markaana xoojisa isku duubnida garabyada ugu adag ee kooxda.

Muddo aan sidaas u sii dheereyn gudaheed, ayay Al-Shabaab ku noqotay mid ka mid ah laamaha ugu firfircoon ee Al-Qaacida, iyadoo fulisay weerarro gudaha Soomaaliya ah iyo kuwo gobolka ka dhacay, gaar ahaan Kenya, Jabuuti iyo Uganda. Hawlgalladan waxay muujinayeen daacadnimada ay u hayso ajandaha caalamiga ah ee Al-Qaacida iyo awoodda ay u leedahay inay ka gudubto xuduudaha Soomaaliya.

46 Hawl-wadeennada Al-Qaacida waxay Soomaaliya ka hawlgali jireen tan iyo 1991. Hase yeeshee, xiriirka labada dhinac inta badan wuxuu ahaa mid qarsoon ilaa 2012, markaas oo isbahaysigooda si rasmi ah oo fagaare ah loogu dhawaaqay.

Si kastaba ha ahaatee, xitaa xilligaas waxaa jiray kala duwanaansho hoose oo aan waligiis si buuxda u baabi'in. Mudnaanta ugu weyn ee Al-Qaacida waxay ahayd hawlgallada caalamiga ah iyo fulinta weerarro astaan ahaan caqabad ugu noqda quwadaha reer galbeedka iyo xulafadooda. Al-Shabaab, inkastoo ay diyaar u ahayd inay weerarro ka fuliso gobolka oo mararka qaar ay ficilladeeda ku sharraxdo qaab caalami ah, haddana waxay si joogto ah isku dayday inay inta badan hawlaheeda, kheyraadkeeda iyo farriimaheeda siyaasadeed ku koobto gudaha Soomaaliya, halkaas oo himilooyinkeeda ugu muhiimsani ahaayeen xakamaynta dhulka, qaabaynta maamulka iyo isku dayga inay noqoto awoodda ugu weyn ee saameynta ku leh bulshada muslinka ah iyo qaranimada Soomaaliyeed.

Hoos u dhaca xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Al-Qaacida ma ahayn hal dhacdo oo keliya, balse wuxuu ahaa geeddi-socod muddo dheer socday oo ay horseedeen dhowr arrimood.

1. Geeridii Godane kadib sannadkii 2014, hoggaanka cusub wuxuu noqday mid ka waaqici badan kii hore. Halkii uu sii xoojin lahaa ajandaha jihaadka caalamiga ah, wuxuu xoogga saaray xajinta iyo maamulka dhulka, kordhinta dakhliga gudaha ee infaaqa iyo sakada ilaa heerar aan hore loo arag[47] , iyo dammaanad qaadidda sii jiritaanka ururka muddada dheer.

2. Cadaadiska amni iyo cunaqabataynta dhaqaale iyo socdaalka ee ay fuliyeen dowladda Soomaaliya iyo xulafadeedu waxay adkeeyeen xiriir joogto ah oo toos ah oo lala yeesho Al-Qaacida. Arrintani waxay yaraysay xiriirka maalinlaha ah ee labada dhinac waxayna ku khasabtay Al-Shabaab inay noqoto mid isku filan, iyadoo horumarisay awooddeeda gudaha.

3. Waxaa sii kordhay kala duwanaanshaha dhinaca mudnaanta istiraatiijiyadeed. Halka Al-Qaacida ay diiradda saartay hawlgallada caalamiga ah, Al-Shabaab waxay si isa soo taraysa ugu dhaqantay qaab u eg kacdoon maxalli ah oo ku kooban Soomaaliya. Tani waxay hoos u dhigtay muhiimadda wax-ku-oolka ah ee Al-Qaacida ku lahayd go'aannada maalinlaha ah ee Al-Shabaab. Sidaa darteed, natiijada guud ee maanta jirta ayaa ah in xiriirka Al-Qaacida uu inta badan noqday mid astaan iyo marjic fikradeed ah, halkii uu ka ahaa awood si toos ah u hagta kala doorashada hawlgallada iyo guud ahaan istiraatiijiyadda Al-Shabaab.

47 Mid ka mid ah warbixinnadii ee Hiraal Institute soo saaray 2020 (non-public), oo cinwaankeedu ahaa "Maalgelinta Al-Shabaab" (AS Financing), ayaa muujisay in dakhliga Al-Shabaab muddadii 2020–2019 uu gaaray ku dhowaad US200$ milyan.

# 12. Xiriirka Soo If-baxaya ee Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta

Warbixintii Machadka Saldhig ee Febraayo 2026 waxay tilmaamtey in Al-Shabaab ay billowday dhismaha xiriir cusub oo ay la yeelanayso Xuutiyiinta Yemen (Ansar Allah). Sida warbixintu xustay, labada dhinac waxay galeen qaab iskaashi oo ku dhisan dano wadaag ah, iyadoo dhinac kasta uu kan kale ka dhex arko faa'iidooyin muuqda.

Tani waa isbeddel xusid mudan, maadaama Xuutiyiintu aysan ku jirin xeendaabka fikirka Salafiyadda Jihaadiga ah ee dhaqanka u ahaa Al-Shabaab. Sidaa darteed, xiriirkan waxaa horseedaya danaha iyo waaqica jira ee kama iman isku ekaanshaha mabda'a. Dhinaca Yemen, Al-Shabaab waxay ka heli kartaa hub, tiknoolajiyad iyo tababar; sidoo kale waxaa jirta suurtagalnimada in la helo marinno badeed iyo kuwo saadka ah oo ku yaalla Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed, iyo in labada dhinacba ay ka faa'iidaystaan xiriirkan si ay u xoojiyaan farriimaha siyaasadeed iyo saameyntooda tartanka quwadaha gobolka.

Si kale haddii loo dhigo, halka Al-Qaacida ay Al-Shabaab siisay sharciyad fikradeed iyo sumcad jihaadi ah oo caalami ah, Xuutiyiintu waxay siinayaan faa'iidooyin wax ku ool ah oo dhinacyada militari, saameynta gobolka iyo mid dhan istiraatiijiyadda ah, xilli Al-Shabaab ay xoogga saarayso xoojinta awooddeeda gudaha Soomaaliya iyo ballaarinta qoto dheerida istiraatiijiyadeed ee ay ku tiirsan tahay.

## Khilaafaadka Gudaha: Garabka Adag iyo Garabka Waaqac-la-noolkaah

Mid ka mid ah astaamaha ugu muhiimsan ee Al-Shabaab waa jiritaanka laba jiho oo fikir oo mar walba isku hardinaya gudaha ururka. Garabka koowaad, oo ah garabka adag, wuxuu inta badan ka kooban yahay xubno uu soo barbaariyey Axmed Cabdi Godane. Garabkani ma aqbalo tanaasul ku yimaadda mabaadi'dii aasaasiga ahayd ee ururka, wuxuuna si adag ugu dheggan yahay aragtida jihaadka caalamiga ah, isaga oo si weyn uga shaki qaba wax kasta oo loo arko inay dhaawacayaan daahirnimada mabda'a.

Garabka labaad, oo ah garabka waaqac-la-noolkaah, wuxuu mudnaanta siinayaa sii jiritaanka ururka, la qabsiga xaaladaha isbeddelaya, ka faa'iidaysiga fursadaha jira iyo xoogga saarista gudaha Soomaaliya. Garabkani wuxuu aad ugu furfuran yahay xulafo dabacsan iyo isu-tanaasul si taxaddar leh loo qorsheeyay haddii ay xoojinayaan awoodda ururka.

Mudadii uu Axmed Cabdi Godane hoggaaminayey Al-Shabaab, ururku wuxuu ahmiyad weyn siin jiray ilaalinta qaab-dhismeedkiisa gudaha iyo xoojinta maamulka uu ka dhisay Soomaaliya. Inkastoo Al-Shabaab ay si rasmi ah ugu biirtay Al-Qaacida sannadkii 2012, haddana qaabka hoggaamineed ee Godane waxaa lagu gartay taxaddar ku aaddan inaan ajandaha caalamiga ah ee Al-Qaacida uu ka sarreyn mudnaanta gudaha ee ururka. Go'aamo badan oo uu qaatay, gaar ahaan kuwa la xiriiray garabyada mucaaradka ku ahaa iyo xubnaha diidanaa siyaasaddiisa, waxay muujinayeen in ujeeddadiisa ugu weyn ay ahayd ilaalinta iyo xoojinta waxa uu u arkayay "hay'ad dowladeed" oo uu ururku ka dhisay Soomaaliya.

Dhanka kale, hoggaanka hadda jira ee Axmed Diiriye (Abuu Cubeyda) wuxuu u muuqdaa inuu si weyn u xoojiyay xiriirka fikradeed iyo istiraatiijiyadeed ee Al-Shabaab la leedahay Al-Qaacida. Sannadihii u dambeeyay, bayaanada, qoraallada iyo farriimaha warbaahineed ee ururka waxay si isa soo taraysa xoogga u saareen mowduucyo ay ka mid yihiin midnimada ummadda Islaamka, taageeridda himilada guud ee Al-Qaacida iyo muujinta isku duubnida dhaqdhaqaaqyada jihaadiga ah ee ka baxsan Soomaaliya. Isbeddelkan ayaa keenay in dad badan oo arrimaha falanqeeya ay u arkaan ururka inuu mar kale ku sii dhawaanayo qaab-fikirka iyo aragtida istiraatiijiyadeed ee dhaqan ahaan lagu yaqaanay Al-Qaacida.

Marka laga eego dhinacan, Al-Shabaab maanta waxay u muuqataa inay daba socoto laba ujeeddo oo is barbar socda: inay ilaaliso saameynteeda iyo awooddeeda hawlgal gudaha Soomaaliya, isla markaana ay dib u xaqiijiso booskeeda gudaha shabakadda caalamiga ah ee Al-Qaacida. Halka xilligii Godane inta badan lagu xasuusto mudnaanta la siin jiray ilaalinta iyo ballaarinta awoodda gudaha ee ururka, xilliga Axmed Diiriye waxaa badanaa lagu tilmaamaa inuu muujinayo daacadnimo muuqata oo ku wajahan mabda'a iyo himilada fog ee Al-Qaacida, taas oo falanqeeyayaal qaarkood u arkaan inay tahay dib ugu noqosho dhinaca jihadii fikradeed ee asalka ahayd ee ururka.

Waagii hore, kala duwanaanshahan gudaha ayaa aad u muuqday, wuxuuna sababay isku dhacyo dhiig ku daatay oo mararka qaar halis geliyay isku duubnida ururka. Laba dhacdo ayaa si gaar ah  loo xusi karaa:Dhacdadii ugu horreysay waxay ahayd sifeyntii gudaha ee sannadkii 2013 xilligii Godane. Khilaafaadka ku saabsanaa jihada ururka ee u dhexeeyay Godane iyo qaar ka mid ah hoggaamiyeyaasha sare ayaa ku dhammaaday dilkii Ibraahim Xaaji Jaamac "Afghaan" iyo Cabdulxamiid Colhaye "Macallin Burhaan", baxsashadii hoggaamiyeyaal caan ah sida Mukhtaar Roobow Abuu Mansuur iyo Xasan Daahir Aweys, iyo xarigga ama waayitaanka tobannaan xubnood oo aan ilaa maanta la garanayn halka ay ku dambeeyeen. Dhacdadan waxay muujisay heerka uu garabka adag diyaar ugu ahaa inuu u gaaro si uu uga hortago caqabad kasta oo ku wajahan awooddiisa fikradeed iyo tan urureed.

Khilaafkii labaad wuxuu dhacay sannadkii 2015, markii xubno ka tirsan Al-Shabaab ay ku dhawaaqeen inay daacad u yihiin Dowladda Islaamiga ah (ISIS). Markaas ayaa mar kale ururku galay dagaal gudaha ah oo dhiig badan ku daatay. Hoggaamiyeyaal sare, oo ay ku jireen dagaalyahanno ajaanib ah, iyo tiro badan oo xubnaha caadiga ah ka mid ah ayaa la dilay, halka tobannaan kale la xiray. Toban sano kadib, kuwa weli nool waxay ku jiraan xabsiyada kooxda.

Dhacdadan ayaa xaqiijisay in inkastoo Al-Shabaab ay mar walba lahayd aragtiyo kala duwan oo gudaha ah, haddana aysan wax tanaasul ah ka gelin ilaalinta hoggaan mideysan oo dhexe iyo diidmada astaamo jihaadi ah oo kale oo tartan la geli kara.

Marka la soo koobo, xiriirrada dibadda ee Al-Shabaab waxay ka tarjumayaan isu dheellitirnaan gudaha ah oo adag. Xiriirka Al-Qaacida wuxuu maanta inta badan u shaqeeyaa sidii astaan fikradeed iyo dhaxal taariikheed. Xiriirka Xuutiyiinta, iyo xulafo kasta oo pragmati ah oo mustaqbalka soo baxa, wuxuu ka jawaabayaa baahiyo istiraatiijiyadeed oo muuqda sida hubka, saadka iyo xoojinta awoodda siyaasadeed. Gudaha Al-Shabaab, garabka adag wuxuu u dagaallamayaa ilaalinta daahirnimada mabda'a iyo sheekada jihaadka caalamiga ah, halka garabka pragmatiga ahi uu riixayo xiriirro dabacsan oo ku dhisan dano, kuwaas oo xoojinaya awoodda ururka gudaha Soomaaliya.

Sidaa darteed, qiimeyn kasta oo dhab ah oo ku saabsan jihada mustaqbalka ee xiriirrada dibadda ee Al-Shabaab waa inay si dhow ula socotaa isbeddellada ka dhacaya guud ahaan gobolka, sida xaaladda Yemen, Badda Cas iyo tartanka u dhexeeya Iiraan iyo dalalka Khaliijka, iyo sidoo kale isbeddelka ku yimaadda isu dheellitirnaanta awoodda ee u dhexeysa garabyada adag iyo kuwa pragmatiga ah ee gudaha ururka.

# 13. Maxaa Laga Fahmi Karaa Isbeddellada Soo Noqnoqda ee Kooxda?

Mabaadi'da ay ku dhisan tahay Al-Shabaab ma aha kuwo aan la taaban karin, taasna waxaa sabab u ah laba arrimood oo muhiim ah. Marka koowaad, inkastoo Al-Shabaab ay ku dhisan tahay mabda' diimeed oo xagjir ah, haddana waxay si fudud u dabcin kartaa ama dhinac u dhigi kartaa qaybo ka mid ah mabda'aas haddii ay u aragto in arrintaasi u adeegayso danaha istiraatiijiyadeed ee sii jiritaankeeda muddada dheer. Sidoo kale, waxay awood u leedahay inay la shaqeyso dhinacyo aan la wadaagin aragtideeda diineed, inkastoo, sida hore loo xusay, in si fagaare ah loo qirto xiriirradaas ay dhalin karto kala qaybsanaan gudaha ah.

Marka labaad, sii jiritaanka ururka ayaa ka mudan wax kasta oo kale. Go'aannada waaweyn ee Al-Shabaab waxaa hagaya saddex mudnaan oo aasaasi ah; dammaanad qaadidda sii jiritaanka ururka, xaqiijinta ilaha dhaqaale ee lagama maarmaanka u ah joogteynta hawlihiisa, iyo xoojinta awoodda militari si miisaanka awoodaha gudaha Soomaaliya uu ugu liico dhinaceeda.

Kala duwanaanshaha iyo loollanka ka jira gudaha ururka ayaa sidoo kale door weyn ku leh jihada uu qaadanayo. Mar kasta oo ay soo baxdo arrin weyn ama go'aan masiiri ah, labada garab ee ugu muhiimsan gudaha Al-Shabaab ayaa isku dhac aragtiyeed gala. Natiijada ugu dambaysa waxay ku xiran tahay garabka gacanta ku haya awoodda dhabta ah ama hoggaanka waqtigaas.

Xiriirka ka dhexeeya Al-Shabaab iyo Al-Qaacida wuxuu ka soo wareegay iskaashi istiraatiijiyadeed oo firfircoon una gudbay xiriir inta badan ku kooban astaamo iyo dhaxal fikradeed. Isla waqtigaas, kooxdu waxay billowday inay dhisto xiriirro cusub oo ku salaysan dano toos ah, kuwaas oo ay ka mid tahay iskaashiga ay la samaysay Xuutiyiinta.

Isbeddelladan ayaa si cad u muujinaya in Al-Shabaab aysan ahayn dhaqdhaqaaq si adag ugu xiran mabda' aan isbeddel lahayn, balse ay tahay urur si joogto ah ula qabsada xaaladaha iyo duruufaha jira. Xiisadda u dhexeysa garabka adag iyo garabka pragmatiga ah ayaa weli ah qodobka ugu muhiimsan ee qaabeeya jihada uu ururku u socdo.

Mustaqbalka, haddii garabka pragmatiga ahi sii xoojisto saameyntiisa, waxaa la filan karaa in Al-Shabaab ay sii ballaariso xiriirrada ku dhisan danaha iyo waaqiciga jira; xiriirro ku salaysan istiraatiijiyad iyo faa'iido wadaag halkii ay ku salaysnaan ljirtey mabda' diimeed oo la wadaago. Sidoo kale, waxay u badan tahay inay dib u fasirto ama ay hoos u dhigto muhiimadda qodobbada qaar ee mabda'eed mar kasta oo loo arko inay caqabad ku yihiin danaha istiraatiijiyadeed ee aasaasiga ah ee la xiriira sii jiritaanka ururka ama himilooyinkiisa mustaqbalka dhow iyo kan dheer labadaba.

# 14. Isbeddelka Al-Shabaab Ma Yahay Mid Gaar Ah? Aragti Isbarbardhig ah

Tijaabada Al-Shabaab marka lala barbar dhigo dhaqdhaqaaqyo la mid ah waxay ka badan tahay oo keliya ogaanshaha in isbeddelkeedu yahay mid aan caadi ahayn; waxay sidoo kale gacan ka geysataa go'aaminta su'aasha ah in isbeddelladaasi ka dhasheen istiraatiijiyad mise ay ku yimaadeen duruufo ku qasbey, mararka qaarna waxay si toos ah u taageertaa doodda ugu weyn ee daraasaddan. Laba tusaale ayaa arrintan si gaar ah u iftiiminaya.

Taliban, markii ay qabsatay Afghanistan sagaashamaadkii, waxay qaadatay qaab dagaal oo caadi ah, balse markii ay la kulantay awoodda casriga ah ee duqeymaha cirka waxaa lagu khasbay inay dib ugu noqoto xeeladihii dagaalka dhuumaalaysiga ahaa ee xilligii soofiyeetka, isbeddel si dhow ula jaanqaadaya habka ay Al-Shabaab ula qabsatay cadaadiska joogtada ah ee duqeymaha cirka. Hase yeeshee, Taliban waligeed ma aysan xallin dhibaatooyinkii qaab-dhismeedka ee qotada dheeraa; waxay ku guuldarraysatay inay isu dheellitirto xaaladaha qabiilka, xitaa markii ay talada haysayna ma aysan daryeelin bulshada dhinacyo ka baxsan nolosha diinta.

Dhanka kale, ISIS waxay qaadatay casharkii ay Taliban dayacday ee ku saabsanaa muujinta dowladnimada. Markii ay qabsato deegaan, waxay si degdeg ah u soo celin jirtay korontada, dib u furi jirtay foornooyinka rootiga, isla markaana waxay muujin jirtay muuqaal dowladeed, iyadoo si weyn u maalgelisay qaab-dhismeedyo maamul. Hase yeeshee, waxay gashay khaladkii ka soo horjeeday kaas oo noqday mid dhimasho u horseeda: iyadoo si xad-dhaaf ah ugu dhegganayd ilaalinta khilaafad islaami ah oo muuqata, waxay dooratay inay difaacdo dhul go'an iyadoo wajahaysa awood aad uga sarreysa, taas oo keentay in awooddeedii dagaal si weyn loo burburiyo, halka awooddeedii dhaqaale ee bilowga ahayd aysan awoodin inay ka magdhowdo luminta dabacsanaantii ay lahayd.

Marka labadaas tusaale la wada akhriyo, waxay sii xoojinayaan doodda daraasaddan. Al-Shabaab waxay u muuqataa inay wax ka baratay labadaba; waxay la jaanqaadday sida ISIS ay muhiimadda u siisay maamulka iyo dhaqaalaha, iyadoo ka fogaatay khaladkii weynaa ee ISIS, taas oo ah inay isku xirto jiritaankeeda iyo haysashada dhul go'an. Taa beddelkeeda, waxay dhulka ku beddeshay sii jiritaanka ururka, si buuxda ula jaanqaadaysa aragtida dagaalka muddada dheer. Sidoo kale, waxay la wadaagtay Taliban waaqiciga xeeladeed ee la xiriira la qabsiga awoodda cirka, iyadoo haddana si ka badan Taliban u danaynaysa maamulka iyo awoodda bulshada.

Sidaas darteed, isbeddelka Al-Shabaab ma aha mid gebi ahaanba gaar u ah, maadaama kacdoon kasta oo sii jira uu qasab ku yahay inuu la qabsado xaaladaha isbeddelaya. Hase yeeshee, isku darka gaarka ah ee ay samaysay ayaa ah waxa ka dhigaya mid si gaar ah loo xuso: waxay si aan caadi ahayn uga faa'iidaysatay khaladaadka ay galeen kuwa kale, iyadoo aqoontaas ku dartay ka faa'iidaysiga fursadaha maxalliga ah iyo diidmo ula kac ah oo ay ku diidday inay dabacsanaanteeda ku beddesho astaanta haysashada dhul. Isku darkan laftiisu wuxuu caddayn u yahay dhinaca istiraatiijiyadda, ma aha oo kaliya natiijo ka dhalatay duruufo ku qasbey iney sidaas sameyso.

# 15. Istiraatiijiyad Mise Qasab? Miisaamidda Caddeymaha

Cinwaanka daraasaddu wuxuu soo bandhigayaa su'aal dhab ah, sidaas darteedna wuxuu mudan yahay jawaab toos ah. Barta ugu horreysa ee daacadda ahi waa in la qiro in inta badan caddeymaha la heli karo loo fasiran karo inay taageerayaan aragtida ah in isbeddellada Al-Shabaab ay ka dhasheen qasab. Ku dhowaad dhammaan waxyaabihii waaweynaa ee horseeday isbeddelladii dhowaanahan ee Al-Shabaab - isbeddellada ku yimid waajibaadka ciidamada Midowga Afrika, gulufkii 2022, kordhinta duqeymaha cirka, abaabulka beelaha iyo abaaraha soo noqnoqda - dhammaantood waxay ahaayeen cadaadisyo dibadda ka yimid oo kooxda ka falcelisay. Qofka shakiga qaba wuxuu si xoog leh ugu doodi karaa in Al-Shabaab ay ahayd oo keliya urur si xirfad leh u maareeyey xaaladaha, isla markaana "istiraatiijiyadda" lagu tilmaamayaa ay tahay magac qurxin ah oo dib loogu bixiyey la-qabsiyo aysan door kale u lahayn. Aragtidan beddelka ahi waa in marka hore loo soo bandhigaa qaabkeeda ugu xooggan ka hor inta aan laga jawaabin.

Jawaabtu ma aha in la diido aragtidan, balse waa in la kala saaro laba arrimood oo ay isku dhex darsatay. La-qabsiga xeeladeed - oo ah beddelidda habka dagaalka iyo maamulka marka ay dhibaato timaaddo - si weyn ayaa loo arkay, waxaana arrintan qofka shakiga qaba inta badan ku saxan yahay, maadaama hab-dhaqanka Al-Shabaab intiisa badan uu yahay mid jawaab u ah cadaadisyada. Hase yeeshee, la-qabsiga jawaab celiska ah, xitaa haddii uu aad u sarreeyo, la mid ma aha ujeeddo istiraatiijiyadeed. Istiraatiijiyadda dhabta ahi waxay ku lug leedahay saadaalinta cadaadiska imanaya iyo isu diyaarin ka hor inta uusan dhicin, iyadoo la aqbalayo khasaare gaaban si loo helo faa'iidooyin fog. Sidaa darteed, doodda taageeraysa jiritaanka istiraatiijiyad dhab ah kuma salaysnaan karto oo keliya liiska jawaabaha ay kooxdu bixisay; waa inay ku salaysnaataa caddeymo muujinaya in Al-Shabaab ay qaabayso xaaladaha ka hor inta aan lagu khasbin.

Marka lagu saleeyo imtixaankan xaddidan, afar nooc oo caddeymo ah ayaa taageeraya jiritaanka istiraatiijiyad dhab ah.

Tan koowaad, dhinaca dhaqaalaha. Dhismaha iyo ilaalinta kayd dhaqaale oo sannado badan dabooli kara baahiyaha kooxda, iyo sameynta nidaam maaliyadeed oo la socda kobaca dhaqaalaha, waxay ka dhigan yihiin isu diyaarin hore oo la sameeyey ka hor cadaadisyada loo qorsheeyey in ay ku badbaaddo.

Tan labaad, dulqaadka. Diidmada nidaamsan ee weerarro lagu qaado ka hor inta aysan ciidamada difaacaya muujin daal, iyo doorbididda dib u dhigista hawlgallada aan fursadaha guushoodu sarreyn, waxay ka tarjumayaan in kooxda si ula kac ah u hormarisay faa'iidada halkii ay ka hormarin lahayd xawaaraha. Si kale haddii loo dhigo, kooxdu waxay dooratаa inaysan tallaabo qaadin marka ay u aragto in tallaabadaasi qaali ku noqon karto, arrin aan lagu sharxi karin oo keliya la qabsiga ka dhasha cadaadiska.

Tan saddexaad, ku riixidda cadowga inuu xadkiisa dhaafo. In dhulka si fudud looga tanaasulo si dowladda loogu dhiirrigeliyo inay ku faafto deegaanno badan oo aysan awoodin inay si buuxda u xasilliso, waxay ka dhigan tahay in daciifnimada qaab-dhismeedka ee cadowga loo beddelo fursad ay Al-Shabaab ka faa'iidaysato. Tani waa u adeegsiga dagaalka muddada dheer qaab weerar ah, oo aan ahayn difaac kaliya.

Tan afraad, wax ka barashada kuwa kale. Sida ay Al-Shabaab u qaadatay casharradii laga bartay ISIS iyo Taliban waxay muujinaysaa hab-dhaqanka urur ka fikiraya sidii uu u sii jiri lahaa, si ka duwan urur doonaya in uu si fudud uga badbaadi xaaladaha.

Waxaa kale oo muhiim ah in si sax ah loo kala saaro waxa dabacsan iyo waxa go'an, maadaama doodda ku saabsan istiraatiijiyadda iyo qasabka mararka qaar si khaldan loogu sawiro inay tahay dood sheegaysa in Al-Shabaab wax kasta ka tanaasuli karto. Arrintu sidaas ma aha. Kooxdu waxay leedahay xudun fikradeed oo adag. Fahamkeeda nafteeda ee ah inay tahay awood Islaami ah oo u taagan hirgelinta Shareecada waa arrin aan isbeddelayn. Hase yeeshee, meel ka baxsan xeyndaabkaas waxaa jira goob ballaaran oo ay aad ugu dabacsan tahay, sida xulafooyinka, magaca Al-Qaacida, xulashada bartilmaameedyada, hababka maamulka iyo xitaa u furfurnaanta wadaxaajoodyada. Waxa mararka qaar u muuqda dabacsanaan fikradeed inta badan waa dhaqdhaqaaq ka dhacaya qaybtaas sare ee dabacsan, mana aha ka tanaasulidda xudunta aasaasiga ah. Pragmatiga kooxda waa mid dhab ah, balse wuxuu leeyahay xuduud u gaar ah.

Sidaas darteed, gunaanadka ugu dambeeya waa mid isku dhafan, balse aan si siman u kala qaybsanayn. Xeeladaha Al-Shabaab inta badan waxaa horseeda qasab iyo cadaadis, halka istiraatiijiyaddeeda guud - dagaalka muddada dheer, kaydka dhaqaale, diidmada in dabacsanaanta lagu beddesho gacan ku haynta dhulka iyo diyaar u ahaanshaha in dowladda ay iyadu is daaliso - ay yihiin wax si weyn loo qorsheeyey ama loo doortay.

Guusha ugu weyn ee ay kooxdu gaadhay ayaa ah inay qasabka u beddeshay mabda' shaqo. Waxay casharradii ay ka baratay cadaadiska u beddeshay hab hawleed ula kac ah, sidaas darteed wixii markii hore ahaa la-qabsi qasab ku yimid ayaa isu beddelay doorbidid istiraatiijiyadeed.
Taasi waa sababta su'aasha ah "istiraatiijiyad mise qasab?" ay ugu dambayntii u noqoto laba ikhtiyaar oo aan sax ahayn. Al-Shabaab marar badan waa lagu qasbaa, balse sidoo kale si wanaagsan ayay wax u doorataa. Hibadeeda ugu weynna waa inay qasabka u beddesho doorashooyin istiraatiijiyadeed. Arrintani waxay muhiim u tahay cid kasta oo ka jawaabaysa khatarta kooxda, maadaama cadow u beddelay la-qabsiga istiraatiijiyad uu awood u leeyahay inuu u gambiyo cadaadiska, waxna ka barto, halka laga filayo in uu ku burburo.

# 16. Gunaanad

Muddo ku dhow labaatan sano, Al-Shabaab marar badan waxaa lagu tilmaamay inay dhamaad ku dhowdahay, waxaa laga saaray magaalooyin, waxaana lagu dhawaaqay inay ku dhowdahay burbur, hase yeeshee mar kasta way soo laabaneysey. Daraasaddan waxay isku dayday inay ogaato sababta arrintaasi u dhacdo, iyadoo ka jawaabeysa su'aal u muuqata mid fudud balse qoto dheeri leh: isbeddelka kooxda ma wuxuu ka yimid istiraatiijiyad mise wuxuu ka dhashay cadaadis? Caddeymaha la helay ma taageerayaan labada aragti midkood si buuxda. Isbeddelka Al-Shabaab ma aha mid gebi ahaanba ay si xor ah u dooratay, sidoo kalena ma aha mid gebi ahaanba lagu khasbay; wuxuu ka dhashay isdhexgal joogto ah oo u dhexeeya xisaab istiraatiijiyadeed iyo cadaadisyo dibadda ka imanaya. Waxa kooxda ka soocaya kuwa kale waa awooddeeda ay kula qabsato dhibaatooyinka, sida isbeddellada ku yimid howlgalka Midowga Afrika, gulufyada dowladda, kordhinta duqeymaha cirka, abaabulka maleeshiyaadka beelaha, abaaraha soo noqnoqda iyo fashilka siyaasadda Soomaaliya, iyadoo dhibaato kasta u beddesha sabab ay la qabsato oo aysan noqon sabab ay ku burburto.

Natiijada ugu muhiimsan ee daraasaddu soo saartay waa: Al-Shabaab maanta ma aha keliya jabhad hubaysan, balse waa muuqaal isku dhafan oo isku dara dagaallada iyo hababka dhaqan ee dowladnimo. Awoodda ay ku sii jirto waxaa ugu yar awoodda dabka, waxayna si weyn ugu tiirsan tahay dulqaad iyo istiraatiijiyad ula kac ah oo ku dhisan "dagaalka muddada dheer", taas oo ay ku dheereyso colaadda, ku beddesho xeendaabka sii jiritaanka ururka, isla markaana ay sida ugu xooggan u ilaaliso saameynteeda marka loo eego magaalo ama calan gaar ah. Aragtidan waxaa laga arki karaa goobaha dagaalka, halkaas oo howlgalladii aan kala sooca lahayn ay u badaleen weerarro qorshaysan oo ka dhan ah bartilmaameedyada militariga iyo kaabayaasha dhaqaalaha. Waxa kale oo laga dheehan karaa canshuuraha ay qaaddo, maxkamadaha ay maamusho iyo adeegyada ay bixiso, kuwaas oo ay ku daboolayso qasabka iyadoo u ekaysiinaysa nidaam iyo kala dambayn. Tani ma aha oggolaansho dhab ah, balse waa ku-tiirsanaan si ula kac ah loo abuuray, waana arrin ay tahay in jawaab kasta oo dhab ahi ay si buuxda u tixgeliso.

Xiriirka ay la leedahay bulshada ayaa isna is beddelay qaabkiisa. Halkii uu markii hore ku dhisnaa cabsigelin ku dhow doorka keli ah, maanta wuxuu isu beddelay isku dhaf ka kooban qasab, ku-tiirsanaan, barbaarin fikir oo joogto ah iyo ka qaybgal bulsho oo xaddidan. Bulshooyinka ay daashadeen shaqo la'aanta, saboolnimada iyo barakaca, ku biirista kooxda ulama muuqato tallaabo weyn; waxay noqotay qayb ka mid ah nolol maalmeedkooda, iyadoo ka dhex muuqata masaajidka, suuqa iyo goobaha waxbarashada. Waxa isku haya dhammaan arrimahan waa tiknoolajiyadda, oo noqotay kaabayaasha qarsoon ee maamulka iyo sirdoonka kooxda, iyo mashiinka warbaahineed ee ay ku dagaallamayso, gaar ahaan dagaalka ku saabsan sheekada ay dadku naftooda ugu sheegaan in ay yihiin cidda guulaysanaysa.

Aragtida ugu qotada dheer ee daraasaddu soo bandhigtay waxay quseysaa mabda'a laftiisa. Inkastoo mabaadi'dii aasaaska u ahayd Al-Shabaab ay ahaayeen kuwo u muuqda kuwo aan tanaasul lahayn, haddana waxay u muuqdaan kuwo la dabcin karo marka ay halis gasho sii jiritaanka ururka, faa'iidooyinka dhaqaale ama danaha militari. Xiriirka ay la leedahay Al-Qaacida wuxuu isu beddelay mid inta badan astaan ahaan u jira, halka xiriirka cusub ee ka dhexeeya kooxda iyo Xuutiyiinta, iyo suurtagalnimada xiriirro kale oo la mid ah mustaqbalka, ay muujinayaan diyaar u ahaanshaha ay u leedahay inay la shaqeyso dhinacyo ka baxsan xuduudihii fikirka ee markii hore loo arkayay kuwo aan la dhaafi karin. Gudaha ururka waxaa weli ka socda dood aan wali la xallin oo ku saabsan heerka dabacsanaanta ay kooxdu yeelan karto iyo in wadaxaajoodku uu maalin uun noqon karo ikhtiyaar. Natiijada dooddaas iyo garabka guulaysta ayaa mustaqbalka kooxda saamayn ku yeelan doona si ka badan dagaal kasta oo gaar ah.

Ma muuqato in mustqbalka dhow ay kooxdu la kulmi doonto burbur, iska ba daa in ay dagaalka joojiyaane. Waa in hoosta laga xarriiqo in xaaladdu aysan meel qura istaagi doonin. Cagsiga, waxaa lagu jiro doonaa iska-daba-wareeg aan dhammaan, taa oo ah waxa ay Alshabaab ku dheeraydo. Waa xaalad labo-boglayn ah. Dhaqaalaha ay kooxda heli karto, hubka gacanta ugu jira, ismaamulkooda, iyo yididiiladooda ku aaddan in ay dagaalamaan amaba wadahadal galaan ayaa ka dhigaaya kuwo ka soo kabta guuldarrooyinkii haleelay sida deegaanadii gacantooda ka baxay amaba hoggaamiye laga dilay__taa oo dad badan ka dhigta kuwo aamina in guuldarrooyinkaas ay dhinac u ridi karto dagaalka. Si kastaba, hal-adaygooda ma aha mid aan toos lagu ifin karin. Waxa ay ku tiirsan yihiin xaalado isbiirsaday, oo la beddeli karo: firaaq awoodeed oo abuuray nugayl, dowladnimo la isku haysto, qaxarka ku qasbay in dhallaanka ay Alshabaab qortaan; kala fogaanshaha filashada shacabka ay ka qabaan waxa ay ahayd in ay u qabato, iyo shacabka oo si taxaddar leh u aqbalaaya kooxda oo doonaysa in ay hanato, halkii ay isku qasbi lahayd.

Waxaa iska cad waxa ka dhalan kara. In halbeegga guusha ee looga adkaanaayo Alshabaab uu noqdo deegaanno laga qabsaday iyo hoggamiye laga dilay, taas oo xoogga saaraysa taaktiik aanan nuxurka gaarsiisanayn. Afar istiraatiijiyadood oo  udub-dhexaad ah qaadistooda ayaa noqonaaya: kow, waa in la wiiqo sumcadda kooxda ee ku dhisan si aragga, se aan ahayn wax ay keensadeen. Dowladdu waa in ay qaaddo tallaabooyin cadcad iyo tan ugu muhiimsan oo ah, bixinta caddaalad. Labo, waa in dagaal dhaqaale lagu qaado; maadaama la ogyahay halka ay wax ka soo galaan, oo ah lacagaha danabaysan, la heli karo marinnadooda ganacsi, iyo lacagaha baadda ah ee ay dadka ka qaadaan__ tallaabooyinkaas oo in badan ka muhiimsan duqaynta xagga cirka ah. Seddex, xoojinta kartida la qabsiga xeeladeed. Alshabaab marka loo eego dowladda waa ay kaga fiicantahay xagga la qabsiga isbeddel. Sidaas darteed, ku nagaanshiyaha deegaanada lagala wareegay kooxda, ka fogaanshiyaha gaarista dhulal fog iyadoo aan kuwii hore la xasilin, iyo gacan ku haynta deegaanada markaas laga xoreeyay kooxda ayaa ah kuwo in badan ka muhiimsan la wareegidda deeganno hor leh. Afar, waa in xal loo helo isjiidjiidka siyaasadeed. Loollanka dowladda federaalka ah iyo dowlad-goboleedyada waxa uu si weyn u caawiyay Alshabaab. Haddii aan xal loo helin murannadaas siyaasadeed, dadaalada amni waxa ay noqon doonaan “hal bacaad lagu lisay”.

Gabagabadii, xaalku dhiiladiisa ayuu wadata, balse wali rajo-beel ma gaarin. Alshabaab ma aha koox ay caqiidooyin dabraayaan si ay howlahooda u fushadaan una gaaraan himilooyinkooda fog, mana aha koox seef-la-bood ah oo aan qorshe ka lahayn waxa socda; taas cagsigeed waa koox ay ka suurtagasho wax waliba, si ay u sii baaqi ahaadaan. Sababta ugu weyn oo ay ku bulaaleen waa dowlad xumida/nugaylka iyo firaaqa ka abuurmay. Waxaa hadba qaabeeya xaaladaha Soomaaliya iyo gobal-weynaha, iyo go’aamada ay qaataan dhinacyada ay is hayaan.

/ saldhigInstitute

/ saldhigInstitute

/ saldhigInstitute

www.saldhig.org

